
Raxmadii Nolosha



GALINKII:

YAASIIN JAAMAC FALAX-FALAX

M A H A D N A Q

Waxaa Qisadan RAXMADII NOLOSHA soo bandhigay YAASIIN JAAMAC FALAX-FALAX, qoraagii sheekadii DHAMBAALKII NAXARIISTA, wax badanna kusoo jirey qoraallada Wargeysyada.

Qoraaggu wuxuu kaloo hadduu Ilaaha khaaliqa ee awoodda lihi oggolaado bilaha nagu soo fool leh soo saari doonaa qiso ku magacaaban " H O H E E Y B A R A S H A D A A D I I ", qeybtii 2aad ee sheekadii DHAMBAALKII NAXARIISTA. Wuxuu kaloo ku talagalsan yahay inuu dib u daabaco iyana Novelkii ROBINSON KURUUSOOW.

Anigoo ah qoraagga Buuggan waxaan si maamuus leh mahad naq aan xad laheyn ugu soo jeedinayaa gebi ahaanba intii taageerada aanan hilmaami karin iga siisay habeynta, farsamada iyo soo saaridda Novelka.

Q O R A H A

Buugan lama daabacan karo, lama turjuman karo, lamana rin karo fasaxa Qoraha la'aantii.

Waa daabacaaddii 2aad Jannaayo 1988ka **

Waxaa soo bandhigay :-

YAASIIN JAAMAC FALAX-FALAX **
**

Qoraaggii qisadii DHAMBAALKII

NAXARIISTA.

*
* Xuquuqdu waxay u dhowrsan tahay Qoraha *****
*****
*****

Walaalayaal haddii aad la kulantaan ***
***
khaladaad yar yar intaad daalacaney-
saan Novelkan xusuusnaada iney tahay
dhibaato nooga timid xagga daabacaad-
da.

***
***

W A X A A Q O R A Y :

YAASIIN JAAMAC FALAX-FALAX

C/O P.O.BOX 313 Muq/Somaliya.

** Q E Y B T A 1 a a d **

MAALMIHII MADOOBAA !!! **

"Run ahaantii waa sunnada nolosha in aadan gafeyn xayndaabka hoyga farxadda iyo tiiraanyada inta aad dunida ku uuman tahay, markaa waa wax ku habboon shakhsi kasta inuu jihaad dheer oo kulul u galo siduu nolol deggan u sameysan lahaa, maadaama xayaatadu gebi ahaanteedba tahay silsilado xiriirsan oo qaxar iyo wanaagba leh.

Sidoo kale khalqigu waa miskiin, garashadiisu xaddidan tahay, aan u nugleyn ka warqabka halxiraalaha koonka iyo shaxda hagardaamooyinka waayaha, markaa waa wax iyaduna sunno ah in ruux kasta oo nadiif ahi nolosha kala kulmayo dhibaato, ayna maalmuhu ku qaloocanayaan..... " !

** Waxaa beryey waa laga yaabo inuusan dad badan uga duwaneyn subaxyada oaadiga ah, laakiin nolosheyda ku reebay xusuus aan dhammaan iyo tiiraanyo joogta ah. Waxay aheyd subax Isniinaad, bil iyo sannad aan sheegidooda ka maagayo.

Waxaa aroortaasi ii aheyd maalintii 6574aad ee nolosheyda, waxaana ii buuxsamay sannadkii 18aad ee cimrigeyga.

Inkasta oo aanan ku hanaqaadin da'dayda sababo ila darsay awgood haddana waxaan ahaa gabar inana oo aan ku xumeyn itaal ahaan sannadkeeda. Hooyadey gacalo waxaan waayey oo ay uunka aakhiro ka mid noqotay anigoo 8 jira, walaalana waxaa markaa i weheliyey walaalkey Faysal oo isna 5 jirsaday markaa.

Aabbahay wuxuu ahaa mid u badan socdaal joogta ah inuu galo, sabaabtoo ah wuxuu ahaa ganacsade, markaa wuxuu raashin iyo waxyaabo kaleba ka qaadi jirey had iyo jeer magaalada Muqdisho una qaadi jirey gobollada dalkeenna qaarkood.

Hal sanc iyo laba bilood ka dib geeridii hooyadey ayuu aabbahay guriga soo galiyey waxa dalkeenna gobollada [illegible] iyo kuwa dhexeba looga yaqaan AAYO, kuwa K[illegible]na EEDDO, taas oo ah naag a uu aabbahaa guursado hooyadaa maahee; aniguse aan middan ula baxay "Shaydaanka Insiga."

Shanta farood ee isku calaacal ku yaalaaba ma sinee ha u qaadan akhriste inaan wada ceebeynayo inta magacaasi "Eeddo ama Aayo " kulminayo, balse waxaan u jeedaa mid aniga noloshеyda saameyn weyn ku reebtay.

Eeddaday waxay markay dhamaysatay toddobaadyadii xiisaha arooska igu bilowday hagardaamo aan dhammaan iyo colaad joogta ah.

Waxay ii qaadatay seefta cadowtinimada, waxay iila dhaqantay si aan loola dhaqmin kuwa arxan laawayaasha ee wadnayaashooda naxariistu ka guurtay.

Waxaa wax walba iiga sii darnaa xumaan iyo samaan wax kasta oo ay Eeddaday ku kacdo ama soo jeediso jawaabta uu aabbahay ka bixiyaa ma noqon jirin waxaan ka ahoyn;- " Waa runtaa ..... Waa sax.....Warkaagaa jira...." Taas oo xilli kasta igu kallifeysay inaan I aaha khaaliqa ah ka sokoow sacabada hoos dhigto mid ka hoogtay dabeecadda san iyo xiriirka wada dhaqanka Insaanka.

Waxaan balleeyey nolol murugo leh iyo maalin madoow, waxaa nafteyda u furmay daah aqal aanan mahadin, waxaan saacado badan la ilmeeyey oo la calool xumaaday sida malakul-mowdku ii dhaafiyey naxariistii hooyo u heyn jirtay ilmaheeda.

Maadaama aan ahaa curadda Aabbahay, waxaan mar walba door bidayey dhibaato kasta ha igu dhacdee inaanan aabbahay iga qaadin fikrad xun iyo inaan ximinayo xaaskiisa.

Taasina waxay igu kalliftay inaan dusha u

rito biyo karaya, anigoon aa adada xanuunka jirkeyga dareensiineyn nafsadda. Waxaan u muuqday inaan ahay naf yar oo ku shaqeysa mishin aanna laheyn damiir dhaqaajiya dareemayaasheeda.

Walaalkey Faysal inkastoo uu laftiisu hagardoomooyin kala kulmay "Sheydaanka Insiga " haddana kolleyba xadka ay i gaarsiisay sharka Eeddaday(Aayadey) ma uu gaarin, waayo dabeecadda iyo dhaqanka Soomaalida ayaa ah mid ayaan darrada iyo dhibaatada maxaliga ee qoyska dusha ka hareysiinaya gabadha Soomaaliyeed.

Midda kale wuxuu u muuqday walaalkey naf yar ee siyaasi ah inuu yahay. Joogidiisa gurigu waxay ku xadidneyd waqtiyada uu wax cunayo iyo saacadaha hurdada oo qura. Waqtigiisa inta kale wuxuu caadeystay inuu ku qaato bannaanada iyo jardiinooyinka magaalada si uu uga maato cannaanta iyo sharka aan dhamaadka laheyn ee Eeddaday"Aayaday."

In ka badan boqollaal jeer ayey Eeddaday"Aayo" awoodda saartay siday iiga hor istaagi laheyd waxbarashada, laakiin aniga waxaa taa igala fududaa iyadoo ah i tiraahdo fuul samada sallaan la'aan.

Wax kasta oo la sheego xataa hadday nafsadeyda gacanta ku qaban laheydna kama yeeleen ka har aqoonta.

WOO HAFAASHO AH AYAAN IS IRI XUMBO CUSKO !!!

Waxaan ahaa miskiinad yar, rajo ah, 15 jirsatay, dhiganeysa fasalka siddeedaad ee Dugsiga Dhexe, ku maman aqoonta, una ooman tacliinta markii aabbahay subax iisoo jeediyey;-

- " Aabbo waxaad tahay curadeydii, waxaadna jogtaa xilligii aan u aayi lahaa xooggaaga; Eeddadaa waa xaamil, isla markaana waxay haysaa ilmahan aan weli laba sano jirsan; marka aabbo howsha guriga waa in aad dhabarka u ridataa oo nasisaa Eeddadaa.

Tan kale iskoolkan aad kusii ordaysid kama soo baraneysid aabbo waxaan edebdarro iyo saqajaanimo aheyn oo gabari waa tii gurigooda joogtee maalin dambe yaanan u jeedin adoo iskool baan aadayaa leh. Waxaad rabto intaan noolahay anaa kuu gadaya ee gurigaas howshiisa habeen iyo maalin adaan kugu ogahay, yeysanna wax xumaana kaasoo sheegan Eeddadaa."

- Allaxintii ay erayadaasi soodeen waxaa in ka badan kun jeer sida maayad danabeysan u dhex sabeynayey jirkeyga jiriirico iyo naxdin filan waa ah.

Run ahaantii isma ogeyn markaan inta ku booday aabbahay oo lahada dhaban ka dhunkaday aniga oo ilmo durba qoysay indhaheyga aan cod naxariisi maasheysay ku lahaa;-

" Aabbo maxay tahay fikradda qaladka ah ee aad ka fahamtay waxbarashada? Miyaadan aheyn Aabbo shalay markaan dhiganayey fasalka 1aad ee Dugsiga Hoose kii maalin walba igula dardaarmi jirey;- (Ogoow mar kasta aqoontu waa galaas dahaba oo aadan inaad rafaad iyo silic u marto mooyee hanan karin!, maxaad maantana intaad gacan igu siin laheyd wadifida taaliintayda aad ii leedahay ka har iskoo-ka?!!!!

Aabbo waasi igama suurta gasho marna oo ka hari maayo waxbarashadeyda ee ka fiirso go'aankaas. Shaqada gurigana soo awalba anigu ma qaban jirin; ma saacadaha yar ee aan iskoolka jiro bey Eeddaday (Aayadey) howl u dhimaneysaa....?"

Erayadaasi markay afkeyga kasii dhammaanayeen waxaan dareemayey xanuunka ul bakoorad ah oo aabbahay si xoog ah iiga dhiftay sinaha isaga oo leh;-

-"Naa bal intey le'eg tahay oo ay igu soo

war celineyso day! Ma anay hadda buug ii daabaceysaa. Inta warka badan iska dhaaftid iskool iskoolkaaga moogiye howsha guriga iyo xannaanada ilmahaba adaan kugu ogahay" oo iska dhaqaaqay.

Oo maxaan sameyn karaa!!!!! Sidii shimbirka nabadgelyada oo lagu hafiyey mowjado badweyn ah ayna cunistiisa u tartamayaan guuto subaaca biyo ku noosha ah ayaan muquurtay badweyn murugo ah.

Waxaan la ilmeeyey ciil. Waxaanna awoodi kari waayey garashada waxaa sameeyo.

Waxaan kolleyba rumeysnaa markaa in fikradaasi iskoolka la iiga joojinayaa tahay mid kasoo fushay maskaxda naxariis darrada loogu dowgalay ee Eeddaday(Aayaday).

Anoo hafasho ah ayaan is iri xumbo cusko e inta calool adeygay baan go'aansaday inaan baryo Eeddaday, si ay odeyga uga dhaadhiciso oggolaashaha inaan dhigto iskoolkeyga; hase yeeshee waxaan la mid ahaa markaa mid dabaal ugu socota fuud kulul.

Markii aan go'aankaas bartyada ah u bandhigay waxaan filayey boy aheyde kalama kulmin Eeddaday waxaan aheyn goodi iyo inaan guriga dibedda ka ahay haddaan qoraka aabbahay diido.

Si kastaba wax ha u dheceene waxaan markasta daneynayey in aanan sinnaba tacliinteyda uga harin.

Dhibaatada igala soo gudbaonaatay hoyga darteed waxay mararka qaarkood maskaxdeyda curdanka ahi igu waanineysay inaan sida dibjirrada iyo kuwa ka hoogay dhaqanka suuban ku noolaado gidaarada iyo hareeraha waddooyinka si aan kol uun uga nafiso cadaabta hoyga iga haysata;- taasna waxaan ka magan galay Ilaaha khaaliqa ah ee wax walba awooda.

Itaalkeyga iyo garashadeyda waxaan intii karaankeyga ah isku howlay inaan maskaxda Aabbahay ka masaxo fikradda khaldan ee uu ka haysto aqoonta; ilaa aan jihaad dheer ka dib ka helay oggolaansho inaan iskoolkeyga dhigto ah ka dib markaanan dhowr toddobaad laba lugood isu daba dhigin.

WAXAAN KU BAADI GOOBAY IFTIINKA BADBAADADA!!!

Waxaan markan jirsaday 18 sano, waxaanna geeridii hooyadey kasoo wareegatay 10 sannadood oo aan ku dhameystay silic iyo uur xumo aan kala go' laheyn.

Canaadka iyo diidmada Eeddaday iiga hor taagneyd iskoolka waxay igu kalliftay inaan noqdo mid sida magnadkii ku dhegan waxbarashada ilaa aan ka ahaado mid tusaale u noqota inta jecel tacliinta oo la igu daydo.

** Rumeyso akhriste iney yihiin wax mar kasta dhaca in maalqabeennada dunida iyo kuwa ugu caansan taariikhda koonkan ay badidoodu asalkoodii hore ahaayeen kuwo nolosha kala soo kulmay rafaad iyo silic aan xad laheyn. Taa darteed inkastoo aysan da'deydu sidaas u weyneyn haddana waxaa i hoggaamineysay maskax garasho dheer oo ayaan darrada waayuhu bareen sida loo qaado wadada qaxarka iyo dhibaatada si aad u hanato furaha badbaadada iyo kheyrka ee halxiraalaha koonka.

Markaa waxaan aaminay waqti ay noqotaba in
mar uun gaari doono haddii aan samirka kaashado
xilli uu nasiibkeygu samaan doono, ayaankeyguna
guul igu soo dhaweyn doono.

Waa abuurid rabbaaniya oo Ilaaha awoodda s
lihi ugu tala galay uunkiisa in nafleyda ku siq
dhulka oogadiisa ay ahaato laba laba (lab iyo d
dig) midna uusan kaligii gooni u jiri karin, ta
oo sugta jiritaanka tafiirta is dhaxasha ee kh
qiga si uusan jinsigaasi u dabar go'in.

Markaa maadaama aan qaar noqday, waxa
go'aan saday inaan ku baadi goobo I"TIINKA BADE
DaDA iyo ka fiirsasho xeel dheer midkii ila qey
la, aa nolosheyda inta ka dhiman.

Sidaas awgeed waxaan bilaabay xulasho iyo
raadis dheer oo tijaabooyin iyo jirabaadiba ay
dhan yihiin si aan ku helo mid ila qeybsada nol
sha, kana dhisan in badan oo xiriirka wada dhaq
insaanka qeyb weyn ka ah.

Boqolkiiba tiro badan garashada hablaha ug
bka ah iyo kuwa kaleba waxay xulashadooda guur
sal uga dhigaan hanti ilaa xad ah, qurux iyo wa
yaabo saameyn weyn ku leh isbadelka ayaamaha
iyo waqtiga.

Aniguse xulashadeyda waxaan sal uga
dhigayey mar kasta helitaanka mid ka dhisan
xagga dabeecadda, ka dibna leh karti, ad-
keysi iyo garasho sare haba noqdo kan ugu
saboolsan dunida hadduu rabee.

Dabeecaddu waa hibo Ilaah ugu deeqo
ruuxa uu doono, waa saxiimadda nafleyda ku
kala takoorta kasbashada furaha samaanta iyo
xagga la dhaqanka bulshada.

Waa xariga kugu xiraya inta u ooman
helitaanka mid garasho suuban, waa waddada
ku goyneysa h[illegible] dhaqinimada iyo kheyrka,
kuuna soo j[illegible]umad qaaliya oo inta aad la
nooshahay kugu ixtiraamto.

Markaa waxaan si lixaad leh u aaminsanaa
in haddii aan helo mid intii la doono kaamil
ka ah xagga dabeecadda iyo dad la dhaqanka
waxa kaloo dhanba ay iyadu furaha horumar-
kooda tahay.

MALAHA WUUBA IGA DARNAA !!!!!

****
****
****
****

Wuxuu ahaa curdan, ubax soo baxaya ah, da'da iga weyn waxaan ka badneyn laba sanna dood, ku sifoobay aqoon, karti iyo garasho suuban, Ilaahna hibo ahaan ugu deeqay xirii iyaha koonka oo ah waxaan u naqaanno DABEEC DDA.

Si kastaba ha ahaatee Mahad ma aheyn mid ku cusub indhaheyga, waxaanna in ka bada shan sannadood wada aheyn isku galaas wada d igta fasal qura dugsi dhexe iyo sareba.

Muddo badan ayuu booska uu ku leeyahay fasalka aan dhigtaa ahaa mid aan iga fogeyn wax ka badan sentimitiro; taasna waxay ii saamaxday inaan barto dhammaanba dabeecadaha iyo fikradaha wiilkaa.

Waxaa kusoo ururay yarkaa gebi ahaanba qodobadii aan salka uga dhigayey doorashada midka aan u hibeynayo nolosheyda.

Wuxuu ahaa mid aan lagu tilmaamin dhere gaabnina muteysan ee dhexdhexaada. Hilibkii su ma badneyn, mana aheyn caato weyda; wuxuu

lahaa xubno aad moodeysid inuu si xeel dheer u kala dhigdhigay farshaxan garashadiisu aysan xad laheyn, suurad cajiibana eebbe waa ugu deeqay.

In kasta oo inaan socdaal ugu kicitimo Qorraxda ay igala dhaweyd inaan u bandhigo wiilkaa la yeelashadiisa wada dhaqan iyo u gogol xaar dhismo qoys waara oo mustaqbalka suura gala xishood ugubnimo awgii haddana waxaan mar kasta nijadda u sheegi jirey iney maalin uun wiilkaa na dhexmari doon. xiriir wanaagsan oo na anfaca aayeheenna dambe.

Tallaabadii ugu horeysay ee horumarinta arrintaa waxay dhacday maalin Isniin ah, 18kii Jannaayo, waqti ay saacaddu abaareysay 10:00-ii aroornimo oo 15 daqiiqo dhiman.

Waxaan dhiganeynay Fasalka 4aad ee Dugsiga Sare ee 15ka May ee Magaalada Muqdisho. Wuxuu ahaa xilli ay ardadu ku jiraan waqtigii quraacda(Break Time).

Waxaa fasalkii kusoo haray aniga iyo Mahad oo qura, Waxaa markaa ismoodsiiyey inaan saaka helay fursad iiga qaalisan wax kasta; laakiin aaway calool adeygii iyo dhiiranaantii aan inta is bido ku waajihi lahaa wiilkaa uguna

bandhigi lahaa waxa i gubaya.

Waxaa i xukumayey markasta xishoodka gabarnimo, hase yeeshee markan waxaan ku dhiiraday inaan meel rays leh oo carro san ah ku hubsado abuur aan filayo in miro wanaagsan uu dhalin doono.

Socod dheeri tallaabuu ka bilowdaaye inta istaagay oo gacanta ku qabsaday buuggii aan ku baranayey maadada Xisaabta baan horey u qaaday tallaabo maanta xusuus weyn ku reebtay maskaxdeyda oo inta ag istaagay Mahad hadal uga bilaabay;- "

"Wallaal Mahad adi roo iga raalli ah ma iigu soo celineysaa xisaabtan aan fahmi waayey markii macallinku sharxayey?" Anigoo salka sii dhigaya kursi dacalka ku haya midka uu fadhiyey kan aan ku hamiyayey barashadiisu, kala furayana buugeygii qoraalka.

Malaha wuuba iga darnaa oo wuxuu ku daalay wax ka fura albaabka isbarashadeenna. Inta si xeel dheer iisoo jaleecay oo muusooday ayuu iigu war celiyey;-

- " Abbaayo Nasro taasi wax dhibaato ah ma leh oo anaa kuugu soo celcelin ilaa iyo inta aad ka tiraahdo(waan fahmay)".

Ka dib wuxuu guda galay inuu ii sharxo xi-

-saabtii, laakiin anigu waxaan ku mashquulsanaa xal u helida aragti shishe iyo waxyaabo ka baxsan goobta.

Xisaabtaasi waxay iiga dhigneyd madfac aan ku jajabiyey buur lixaad weyn oo ka gudubkeeda ruux kastaaba ku daali lahaa si uu u gaaro hoyga nabadda iyo guusha.

Maalintaasi waxay aheyd maalintii ugu horeysay oon waqti intaa le'eg anaga oo kaligeen ah meel ku wada qaadanno.

Inkasta oo hadallada aan isdhaafsaneynay ay kuwo caadiya iyo kuwo khuseeya waxbarashadayada u badnayeen haddana wuxuu ahaa xilli uu noo furmay weji cusub oo horumarka waxbarashadeenna ah. Waxaa noo baryey waa samaad oo fallaaraha ileyska cadceedu u dirtay dunida ay ahaayeen kuwo ilbogasho leh.

Mun ahaantii anagoon dareemin ayuu na weydaartay waqtigii quraacda loogu tala galay. Waxaan ka war helnay fasalkii oo ardaydii soo buuxisay iyo macallinkii xiisadaa lahaa oo dhex taagan galaaska.

"Waa yahay Abboowe" ayey aheyd jimlad si kadis ah ay dareemayaasha dhegihiisu ugu tabiyeen, taas oon si boobsiisa ula gaaray Mahad aniga oo usii dhaqaaqaya booskeygii aan awalba kasoo kacay.

Waxaan isu qaatay maalintaa inaan hore u qaaday tallaabo ka dheer kun meyl oo horumara; waxaan is moodsiiyey inaan gacanta ku dhigay furihii guusha arrinta aan ku hamiyayey.

Maalintii labaad ayuu dhacay kulan ka qiima badnaa kaas. Subaxaa malaha aabbahay oo kheyreysan baan la kulmaye wuxuu isoo siiyey xirmo lacag ah oon kolleyba si lixaad leh ugu farxay, waayo ma fileyn.

Ardadii oo ka maqan fasalka ayaan milicsaday Mahad oo kaligii kursi fadhiya, inta u dhawaaday ayaan sowd aan aad uga taxadarayn ku iri;-

"Mahad wallaal baarkaan rabaa inaan quraac u doontee kaalay ii wehel yeel."

Wuxuu ahaa mid Ilaahay hibo u siiyey xishood iyo akhlaaq wanaag; inta dhoola caddeeyey ayuu iigu jawaabay;-

" Abbaayo waad mahadsan tahay intii la doono, ee kaligaa aad adoo iga raalli ah. "

Kagama tagin intaa ee waxaan u tabiyey in aanan kaligay aadi karin baarka, ugu dambeystiina waan u taxaabay halkaa.

Waxaan hubaa maalintaa xad kasta ha gaarsiisnaadee inuu ku abuurmay Mahad oudurka daa-

-wada kaliya leh ee loo yaqaan Jaceylku. Waxaan maalinkaas si wada jira uga tallownay buur weyn oo na dhex taalay. Waxaa labadayadaba naga tirtirmay xishood, cabsi iyo shakigii aan kala qabnay.

Dharaartaa wixii ka dambeeyey waxaa tallaabo tallaabo iyo taako taako u kordhayey isbarashadeenna, toddobaadyo ka dibna waxaa caadi noqotay inaan xilliga ay soodaan xiisadaha waxbarashadu mooyee waqtigayaga firaaqada intiisa kale isku meel ku qaadanno.

Malaha anaa isu qabay inaan biyo kula kallaho subax walba kaligay geedka ubaxa kalgacalkee isagaaba iga darnaa. Waxaan dareemayey mararka qaarkood kullamada aan yeelano in midba kan kale aad ugu weyn yahay; laakiin qofkayana ma awoodin inuu si dhiiran afkiisa usoo mariyo jimladda;-

"Wallaal waan ku jeclahay " taasi dhaqso u suura geliso aasaaska qòys ay wada abuuraan laba wadaagtay cishqi ay xiddiddadiisu ku dheeraadeen dhulka si mirihiisu ay ugu tarmaan ifka.

WAXAAN KAA SUGAA WAA JAWAAB FARAX LEH !!!

Waxay aheyd maalintii 123aad ee isbarasha-da aniga iyo Mahad, midka cishqigiisu ku abuur-may markan xubin kasta oo jirkeyga ah, Waxay aheyd dharaar Tallaado ah oo sadder maalmood ka dib aan isu diyaarineyno gelitaanka Imtix-aanka kama dambeysta ah ee Dugsiga Sare.

Maalintii inta aan kursiga lasoo fariistay ku iri;-

" Wallaal xisaabtan iiga shaqee " waxaa kasoo wareegtay bilo dhowra. Waxaan gaarnay xili uu xidideystay xiriirkayagu. Xadiga intaa le'eg ee jaceylkaygu gaareyna mid kayana kan kale uma bandhigin inuu la il daran yahay culeyska caashaq uusan afka soo marin karin. Laakiin way iska ca-deyd garashada wada socodkayagu inuu yahay mid ku saleysan mustaqbal dambe iyo guur.

Waxay aheyd tallaabo geesinimo mudan oo si niyad ah qodxaha iyo dhagxaanta uga sifeysay wadd-dii aan maalin kasta u mari jirey geedka jaceylka ku naaxay ilmada caashaqa dartii uga soo qulqu-shay indhaha qalbiyada isu ooman; markii Mahad wa-rqad uu malaha muddo dheer ku daalay xulashada er-yadii uu ku qori lahaa oo xambaarsan wax ka cusla-lahaa haddii loo miisaamo buuraha Himilaaya uu ga-

midig iiga dhiibay isagoo xishood awgii wejiga ka dadbay indhaheyga lehna;-

-- "Abbaayo Macaan Nasra, tani waa warqad ay ku idil yihiin wax kasta oo khuseeya xiriir-keenna. Markaan saaka kasoo qaadayey gurigeyga waxaan sare u tuuray shillin aanan xarash iyo madax mid uu u dhici doono ka warqabin, balse kii aad u qaadato adigu ah; laakiin aniga midna sacaadadeyda iyo guusheyda yahay kan kalena hoogeyga iyo baaba'-ayga yahay.

Waxaan in ka badan kun jeer kaa codsanayaa marna in aadan qaadan go'aan aadan ka fiirsan kaasoo wax u dhimaya xiriirkeenna.

Waxaan filayaa warqaddaasi iney noqon doonto mid kaahisa iftiinka aan ku gaari laheyn barta badbaadada iyo kheyrka ee mustaqbalkaenna. Waxaan kaloo kaa codsanayaa in aadan sahashanin naf aad sabab u noqon karto geerideeda iyo nolosheedaba. Waxaan kaa suga-yaa kolleyba waa rajo suuban iyo jawaab farax leh..."

Markay erayadaasi afkiisa kasii dhamaanayeen waxay indhaheygu qabteen dareenkiisa inuu aad ugu weyn yahay jaceylkeygu oo ilmo indhihiisa kusoo istaagtay.

Inta isku naxay oo ardey meel aan naga dheereyn farfadhida ka baqay iney arkaan wiilka la ilmeynaya utunta caashaqeyga ayaan inta garabka qabtay u dhaqaa-jiyey dhinaca Bari, meel aan markaa firaaqo bidayey, una sheegay in aanan intii karaankeyga ah waxba ka

hagraneynin, wax kasta oo suurta gal ahna aan ma
kasta kolleyba ahay garabkiisa.

Markii la gaaray xilligii rawaxaadda iskooli
"Waa inoo berri haddii Ilaaha awoodda lihi oggol
do" baan inta isku nabadgelyeynay abaaray mid wa
hoygiisii.

Sidaan usii duulayey markaan gurigeygii tag
horey kama furin dhambaalkii Mahade inta meel xa
dhigtay baan markiiba dhex galay howshii guriga.
galabnimo markay aheyd saacaddu oo aan kasoo fara
shaqadii guriga ayaan inta hoosta ka xirtay qolke
jiifka galka ka jeexay warqad aan akhriskeeda da
yey.

Inta lasoo baxay ayaan dabiyo dacal ku bogay
lacasho. Run ahaantii wax weyn kuma soo kordh
arqadhaasi xusuusteyda, waayo waan filayey in wax
qorani kolleyba aysan ka baxsaneyn xiriir wanaags
iyo axdi ballan adag dugsada oo na dhex mara anig
Mahad, taas oo aan wax badan qudheydu ku taamayey

Laakiin waxaa la yaab igu riday erayada soo
shada iyo naxariista loogu dowgalay, sawirka fall
ha isdhaafay ee ka dhex dusay Hoyga Kalgacalka i
xubiga oo ah WADNAHA oo sida farshaxanimada iyo k
iirsashada leh Mahad ugu soo xardhay dhambaalkiis

Q E Y B T A 2 a a d

***

Waxaa markaa barxadda yar ee dugsiga isugu soo ururay Arday ilaa boqol gaadha oo sugeysa golitaanka fasallada markay macallimiintu xiisadaha u diyaargaroobaan.

Anigoon is faanineyn waxaan xaqiiqdii ahaa mid aad u xishood badan, sidaa darteed waxaan iyadoo aan awalba dhowr hadal ka dhex maqlay ardeyda oo isku xamaaya aniga iyo Mahad doorbiday inaanan u dhaqaaqin Mahad oo meel aan iga dheereyn soo dhaweynteyda isu diyaariyey.

Waxaanna markaa mijadla iska lahaa;-

" Haddii intaas oo indhood oo kuuoo eegeysa aad inta dhexmarto isla taagto Mahad, isna kuu gacan qaado si ka baxsan salaanta caadiga ah isagoo farax iyo qosol yar yar isku dhafaya; soo rumoobi maayaan waxyaabo badan oo hadda mugdi uga jira dulmiilayaal tiro beelay!!!!" oo inta gees kale ka warceegtay isaga tagay Aamina oo aheyd saaxiibadeyda kaliya een ku dhaarto.

Mahad waxaa hareereeyey argagax iyo filan waa, wuxuu la gariiray naxdin iyo shaki wada jira, wuxuu u qaatay inuu sunta halista ah ee loo yaqaan bisin ma gaadhada u adeegsaday xiriir walaal-

tinimo balse aan u gudbin xadka shishe.

Wuxuu la yaabay dabeecadda uusan iiga aran ee intaan kasoo hor baxay aniga oo ataa u dhoola caddeyn inta gees uga weecday abaaray Aamina. Wuxuu damcay inta uu hex jibaaxo Ardadaa badan inuu salaan diiran saarsiiyo gacalisadiisa; haddana wuxuu ka baay iney waxan wax ka weyn soo gaaraan iyaoo ardadoo dhami soo wada fiirinayso.

Wuxuu niyadda ku samirsiiyey iney sugto illi fiiqaqo ah oo uu igula kulmi si uu u ubgudbo balse waxa dhacay.

Markii galaasyadii la galay ee la gaaray waqtigii qaraacda daqiiqado ka dib ayaan meel gees ah jardiino cidla ah uga gacan maadiyey Mahad oo meel aan iga dheereyn meereysanaya.

Inta si fiican usoo dhaweeyey ayaan u sheegay ineysan aramida jaceylku kaligii gooni ku aheyn ee anigaba la igu weyn yahay, laakiin aan muddo badan awoodi kari waayey sidaan uga bixi lahaa xayndaabka xishoodka ugubnimo oo waqti badan iga hor taagnaa inaan arrin-

-tan usoo bandhigo.

Waxaan cahdi bir ah iyo ballan uga qaaday inaan la wadaagi doono ilaa xad muxibada cishqiga dhowr bilood jirsatay, laakiin waxaan ku waaniyey inuu noqdo markasta siyaasi digtoon, si uusan nacaska iyo inta ka hesha isku dirkuba u dareemin jaceylkeenna, isna waa iga aqbalay.

Wixii maalintaas ka dambeeyey waxaa hadallada-yada u badnaa;-"Abbaayo Macaan, gacaliyo, qaalidey-diiyeey.... iyo erayo kale oo tilmaan u ah jirrtaan ka cishqiga niyadda ah. Wuxuu dardaarankeennu u badnaa inuu jaceylkeennu ahaado mar kasta mid ka fog i tus tus, xiiso iyo niyad khiyaali ah.

Waxaan dhaar aan duugoobin isugu marnay isuusan midkeenna weydeynin wacadka, balse ma noo noqotay sidaa? BAL ADBA!!!!!

Maadaama aan ahaa rajo dhibaato xoog lihi ka haysato xagga qoyska ma awoodi karin inaan inta ku ballamiyo Mahad meel uun munaasib ah ama aqalkayaga aan ugu tago dabadeed inta badan. Markaa waxaan ka san waayey inaan waqtiyada aan ogahay suuqa adeegii

-doodna ugu tago anigoo ku xisaabtamaya waqtiga.

SOO NOOO ADOO NABADA !!!!!!

Si kastaba duruufo adagi ha noola soo darseen aniga iyo Mahade wuxuu xiriirkayagu gaaray heer aad u sareeya, waxaana noo dhimmanaa oo kaliya baad moodeysay inuu suura galo nikaax, aroos farxadeed makansada si aan u balleyno hoyga raaxada iyo istireexa koonka, laakiin taasi ma dhicin waxay sababsatayba!!!!!!!!!.

Waxaa isdhaafay saacado, waxaa dhamaaday maalmo, waxaana is waydaartay toddobaadyo, waxaa shar iyo kheyr wixii Ilaah u qadaray isku sagootiyey bilo. Waxaanna galnay Imtixaankii kama dambeysta ahaa ee Dugsiga Sare, shuhuur dabadoodna waa lasoo dhejiyey. Gudubnay aniga iyo Mahadba; ayaamo dabadoodna wuxuu guda galay bilowga howlaha gudashada shaqada Qaranka.

Mahad waalidkii waxay ahaayeen reer miyi xoolo dhaqato ah, isagoo 10 jira ayuu u yimid abtigii oo deggenaa magaalada Muqdisho, halkaas oo uu waxbarasho Dugsi Hoose ka bilaabay. Markii uu 15 jirsaday ilaa waqtigaanna wuxuu ahaa mid isagu soo saarta nolol maalmeedkiisa, maadaama abtigii ahaa sabool danyaroow ah.

Wuxuu kariye cunto ka ahaa muddo badan makhaayad weyn oo ku taallay agagaarka suuqa weyn ee Maana Boolyo loo yaqaan kuna yaala M. Muqdisho oo gelinka uu iskoolka dhigto mooyee kan kale uu ka xamaalan jirey, marna uuba ka noqday maqal haye.

Beryo ka dib waxaa looga yeeray Dugsiga Tababarka Macallimiinta ee Xalane, si uu isugu diyaariyo gudashada waajibaadka Shaqada Qaranka, markii uu bilo ka dib soo dhameystayna waxaa loo sheegay in lagu qoray Deg. Boorame ee Gobolka Awdal ka mida hadda, loona sheegay inuu macallin ka noqon doono Dug. H/Dhexe ee Degmadaa.

Run ahaantii filan waa iyo wel wel xad beelay bey igu abuurtay markii Mahad galabnimo Khamiisa ila soo socodsiiyey in lagu qoray Degmadaa, uuna socdaalkaa dheer bixidiisa isu diyaarinayo maalinta Sabtida ee soo socota haddii Eebbe yiraahdo.

Wuxuu ii sheegay iney ka qaadatay waqti badan inta jeer ee uu isku duubay Sarkaal si badelkaa dheer looga baajiyo, looguna qoro Muqdisho, laakiin uu ku guuldareystay.

"Waxaan abbaayo anoo la ciirciiraya xubiga iyo kalgacalka xiddidada mutay ee na dhexyaal filayaa inaan u baxo magaaladaa aanan dadkeeda iyo dalkeeda midna aqoon, laakiin waxaan kuu sheegayaa inuu bixi doono oo kaliya muuqeygu ee qalbigeyga iyo xusuusteyduba ay baaqi ku ahaanayaan hoyga iyo barta aad askunsan tahay" buu si uu ka fiirsaday Marhad iigu yiri isaga oo i samirsiinaya.

Erayadaasi waxay iiga darnaayeen xabadaha ka dhaca qoriga Mishiganka loo yaqaan oo si naxariis la'aana la iiga toogtay halbowlaha wadnaha ee dhiigga kala haga. Waxaan u qaatay iney tahat markii iigu dambeysay aragiisa. Waxaan is tusay inuu u baxayo hoy uusan cidna ka aqoon, wax walbana kala kulmi karaan.

Waxaan ka codsaday inuu iskaba dhaafo shaqadan loo dirayo oo uu ka xamaasho magaalada, laakiin Mahad wuxuu si qaboow oo deggan iigu sheegay in kolleyba hadduu dhimanayo ama wax ku dhacayaan aysan jirin meel ka badbaadin karta.

Markaa wuxuu igu waaniyey saacado badan inaan samirka kaashado intii karaankeyga ah, sugana xilliga

"Gacaliye, ma awoodi karaa inaan waqtiga intaa le'eg ee aad maqan tahay ku noolaado halkan anoo la mida shimbir garab la'. Ma ku raacaa tolow wixii ka dhici lahaaba ha ka dheceene!! Si aan kuula qeybsado xabadda rootiga ah, kaalana dugsado dhaxanta iyo duufaannada dabeylaha cishqiga" ayaan anoo indhaheyga ilmo ku joogto ugu tiraabay Mahad.

"Abbaayo Nasro run ahaantii waxaan filayaa in aysan dunida jirin laba kalgacalka caashaqoodu gaaro xadka ugu sareeya ee xiriirka Insaanka, uuna u dhexeeyo ballan iyo wacad ka miisaan badan culeyska badweynnada Adduunka, iskuna saanyaday doorasho kora iyo niyad saafi ah; haddii ay jiraanna waa labadeenna.

Waxaan ballan adag kuugu qaadayaa in waqti kasta iyo xilli kasta ha igu qaadatee aanan damcin gabar kale adoo nool, waxaan hubaa inaad si weyn ugu beeran tahay nud kasta, unug kasta iyo xubin kasta oo ka mida jirkeyga; haddii aad shaki ka qabto in aad ballanteenaas ka baxana waxaa aniga taa igala sahlan iyadoo samada jaranjar la'aan fuul la igu qasbo" ayuu Mahad oo weli raalli geli

is lihi iigu jawaabay.

.." Xabiibkeygiyoow waxa i gubayaa waa cishqi, waxa i shidayaa waa umal caashaq, waxaan la ilmeynayaa waa muxibadaada, waxaan sugayaana waa guur xalaala iyo aroos oebbe noo aqbalo. Haddii aad gaarto goobtaa Ilaaha khaaliqa ahi ha kungu deeqo naxariistiisa, ha kuu hibeeyo sacaadadiisa hana kaa xijaabo wax shara oo dhan, hoygaad tagtaaba kusoo dhawee; meeshaad istaagtana ku farax.

Ton kale, gacaliye ogoo, dumarka waxaa ku badan kuwo ka go'ay kala geynta qalbiyada isku dhaarta ee ka feejignoow waligaa, ka digtoonoow kuwa loo daayey isku dirka iyo xaasidnimada ee ku naaxa xumaanta iyo sharka, garowsanoow seken kasta oo kusoo mara inaan mar kasta muquursanahay badweynta muxibadaada.

Waxaan sare u heyn doonaa intii la doono wacadka iyo axdiga na dhexyaal anoo kaa filaya adna in aadan iga liidan doonin" ayaan si dardaaran ah faraqa ugu guntay Mahad.

ISMA ORAN WALIGAY HOOSTAADA AYEY MUSIIBADU KA AHAAN!!!!!!!!

Mahad waxaa dhameysay jiriirico, waxaa kor iyo hoos
qaaday maayad la ciireysa muxibo shindhalad ah, waxaa
lool xumo ku abuuray hadalladeydii. Markuu cabbaar aam
naa buu inta dhankeygii soo jaleecay si qaboow oo naxar
dhameysay iigu yiri;- " Abbaayo dunida ma jiro shakhsi
isku filan oo iskii u madax banaani isagoon kaalmo ka he
mid kale, nafkastaana waxay u jirtaa iney kaalmeysato k
dhigato wehel kii ay isku fikrad, garasho iyo dabeecad
noqdaan, taas oo ku tuseysa in uunku u wada nool yahay
la is gargaarsado.

Waxaad ku calool samaataa abbaayo in aysan mid kale
oori ii noqoneyn adoo nool, haddaan ku waayana aan waayi
doono wax ku qaaliya jiritaankeyga. Adoo igu kalsoonna
waxaan ku leeyahay Iɻaaha weyni isagaa wax walba awoodee
noo aqbalo teenna, nasiibkuna ha noo saamaxo xilli aan
dheereyn inaan gaaro aroos farax leh iyo kheyr.

Aniga oo ay iga muuqato inaan aad uga maqsuuday eraya
aas ayaan si qaboow u iri;- " Hadda abboowe goormaad ba
saa?

"Hadduu Eebbe idmo maalinta Sabtida".

"Hadda waxaan ku iraahdo garan maayee, meeshaad tagtaaba
kusoo dhaweysay, dhulku abbe iyo hooyo kuu noqoy: adna
Iɻaah ha kaa dhigo kii ka adkaada naftiisa oo gacaliye
habaaska ka dhowra xiriirkii dhexdeenna."

-"Soomaalidu waxay tiraahdaa(Aɻla waani baa waansan)"
oo abbaayo maskax igu filan baa i hoggaamineysa ee
axdigeennu inuu marnaba dhankeyga ka wiiqmo ha ka
shaki qabin."

-"Waa hagaag ee dallaal aroornimada Sabtida haddii alla
idmo iga soo mar intaadan bixin jardiinkii gurigeenna
u dhawaa si aan kuu sagootiyo" baan anoo waqtiga soo
gabagabeynaya ku iri Mahad.

-"Waa yahay e nabad gelyo, isma dhaafnp" baanna ku kala
tagnay.

Habeenkaa waxaan aqalkayagii usoo hoyday anigoo aad
uga niyad xun bixitaankiisa. Aroornimadii dambena ma-
rkii waagu beryey ayaan anigoo cududaaryo been ah u sh-
eegaya Eeddaday usoo kallahay goobtii ballanta. Malaha
daqiiqado ka hor buuba ku diyaar ahaaye waxaan ugu ta-
gay isaga oo iisii fadhiya goobtii.

Sekenno ka dib waxaan u jiheysanay bartii uu ka bixi lahaa. Dardaaranka, is waaninta iyo wax san isu sheegu labadayada kama dhammaan ilaa aan soo istaagnay meeshii inuu ka baxo loo cayimay. Waxaa dhoobnaa arday fara badan oo ay u dhamaayeen qalabkii sahaydu;

Markaan soo istaagnayba waxaan la kulanay seeri uu askari meesha taagnaa ka dhawaajiyey si ardeydu ay u fuulaan baabuurta.

Intaan isku aadinay derbi yar ayaan tiro dhowra dhunkasho labada dhaban isaga dhiibnay, aniga oo subaxaa ka hor isu haystay inaan aad u calool adkahayna waxaan is arkay anoo daldalaya;- Alla awwoowe allaha ku nabadyeelo, caafimaad kusoo noqo...."

Isna isagoo Aamiin Aamminta haya ayuu u laba lixaadsaday dhankii gaariga oo ardeyda badankooduba fuuleen. sekenno ka dib waxaa wareegay shaagii gaarigii nabadgelyada ee sidey kan ku weyn nolosheyda.

Inta labada gacmood sare u qaaday ayaan cod qaboow oo aysan ka warqabin niyaddeydu hoos ugu iri;-"Jaaw nabadgelyo; wadadu hoodiyo nasiib, dadkuna hooyiyo aabbe..." Markey erayadaasi afkeyga kasoo baxayeena waxaan sacabka marinayeyilmo si xoog ah uga soo bur-

-qatay indhaheyga kalgacal dartii.

Inta isku naxay, ilmadii iska masaxay, anigoo iska fiirinaya dadkii harecraheyga joogay ayaan haddana isha ku xaday baabuurtii uu mid ka mid ahi siday halbowlihii wadnaheyga oo sida tareen isugu xiriirsamay. Inta neef weyni iga soo baxday ayey niyadeyda kusoo maaxatay hees lagu codeeyey laxni muusiko oo aad u macaan, uuna ku luuqeynayo sowd naxariis loogu dowgalay oo ahaa;-

-"Waxaan kugu sagootiyey safar kheyr leh socotaye sidii roon..Waxaan kugu sagootiyey niyad sidig ah salaan taagan awgaa samoow hadday ku waydana si ay noqonba mooyee, anna waan ku sugayaa ee soo noqo adoo nabada....Soo noqo adoo nabada...Soo noqo....."

Markuu iga qarsoomay muuqii gaarigu ayaan horey u qaaday tallaabo igaga cusleyd 1000 kiilo, waxaa ila tagtay maayad la ciireysa xusuus waayo waayo ah, anigoon ka warqabin masaafadaan soo jarayna waxaan balleeyey aqalkayagii.

Waxaan go'aansaday inaan intii karaankeyga ah ku fara adeygo xarig haddii umad dhami isu kaalmeysan laheyd kala gaaraa ay ka caajisi lahaayeen keegga ahaa ax-

-diga iyo ballanta aan la galay midka aan la muudsaday macaanka miraha cishqiga.

Amarada Eebbe ugu tala galay koonkan waa kuwo cajiiba. Waxaa laga yaabaa inaad jecleysato wax ilaa xad aan la qiyaasi karin oo ka harkiisu kuugu muuqdo halaagga noloshaada iyadoo xigmadda Alle laga yaabo waxaasi in baaba'aaguba ku sugan yahay, halka aad wax ka karahdo intii la doono iyadoo ay suurta gal tahay inkaasi kheyrkaagu ku jiro. Waa wax kale oo mar kasta dhaca in nafta suuban ay nolosha iyo dabeecadda kala kulmeyso dhibaato iyo rafaad, ayaamuhu ku qaloocanayaan; ayna dhaqankeeda, doonisteeda iyo fikradeheeda hor istaagayaan kuwo ka hela qaxarka dalka, kuna nool dhiigga masaakiinta.

Mahad tag; ha tagee wuxuu meel ka dheer degaankeyga boqolaal KM la aaday qalbigeygii, xusuusteydii iyo garashadeydiiba; waxaan muquurtay mool badweyn murugo jaceyla oo aahan u helin wax miciina; waxaan har iyo habeen wehel u noqday xusuus ayaamo jaceyl oo samaan igu dhaafay, gocashadooduna iga ilmeysiisay. Waxaan habeen kasta saacado badan ku haysan jirey laabta sawir igala qiimaa badnaa wax kasta oo dunida jira.

Caku adduunyo, illeen waqtigu isuma kaa sheego, il-

-leen wax walba kuuma noqdaan sidii qorshahaagu ahaa. Illeen garashadaadu waa mid ka daahan waxaad berri mudane mustaqbalkaagu kuuguma hirgalo sidaad u jeexatay. Tabar daranaa khalqigu suu kuma guuleysan ka warqabka ayaamihiisa hoogga ee maalmuhu ula gaban yihiine.

Waligay waxaan ka cabsi qabay in dumarku waa abuuraha fidnada koonkee Mahad ay haleesho mid ku takhasustay sida loo kala faquuqo laba is jecel iyo qalbiyo israacay oo ay ka masaxdo maskaxdiisa ballantii adkeyd ee na dhextiil oo anna markaa aan noqdo mid la macaluusha dhadhanka miraha sunta ee cishqiga, mase is oran waligay lugahaaga ayey masiibadu ka ahaan!!!!!!.

Maskaxdeyda ma gelin marna hoygiinna ayaa lagu farsameyn doonaa sawaariikhda loo adeegsan doono burburinta xiriirkiinna, adiguna waxaad noqon doontaa midda baasiinka taraqa kula daarta boeraha caashaqa ee ku naaxay ilmada jaceylka runta ah!!!!!!!!!.

Laakiin wax waliba waxay u dhacayeen sidii uu ugu tala galay Ilaaha khaaliqa ahi, anna aan u arkayey iney yihiin wax ka baxsan awoodeyda.

Q E Y B T A 3 a a d

ABBAAYO INTAASIBA WAA WAX DHAN !!!!

Waxay aheyd maalin Axada, Bishii Luulyo, sannad aan she gidiisa ka maagayo. Magaalada Muqdisho oo degaankeedu xoog kala sareeyo waxaa waddooyinkeeda qulqulayey daadad aad u xoog badan oo ka yimid roob lixaad leh oo si ba'an u hale lay magaalada. Waxay aheyd waqti ay goorsheegtadeydu ku a aarneyd 11:30 subaxnimo(ama shan saac iyo bar.)

Saddex saacadood iyo waliba daqiiqado ayey igu qaadat inaan taagnaado wadada janbigeeda anigoo la ciirciiraya c badan oo igaga imaanayey alaab aan kaga soo adeegay suuqa ee makaaraha loo yaqaan kuna yaal Muqdisho, qadd ahaanna ku igaga sugayey; maxaa yeelay waxaan waayey bas aan u raa xaafadayada oo in doora ka fogeyd goobtaa.

Xataa haddii aan lugeyn lahaa waxaa i hor istaageyey d caha roobka sida ba'an u da'ayey, daadadka iney i qaadaanb sigi lahaa iyo culeyska igaga imaanayey alaabta aan sido.

is oran waad sameyn doontaa. Waxaan dhinac fariistay mid aan ila dhalan, i dhalin, ehel ii aheyn, isla markaana ah markii iigu horeysay ee indhaheygu qabtaan. Waxaan si foojigan uga digtoonaa dhammaanba xeelad kasta oon islahaa wuu kugu sasaban karaa.

Markaan soo galay een fariistay, isna gaarigii dhaqaajiyey waxaan ka badneyn 10 mitir ayuu inta isoo jaleecay hadal iiga bilaabay;-"Barasho wanaagsan abbaayo; aniga waxaa la i dhahaa Xasan" oo inta hadalkii joojiyey isoo eegay isagoo sugaya inaan anna is baro.

"Cabdi" baa la i dhahaa bey aheyd weedhii ugu horeysay een u tabiyo anigoo ka qarinaya magaceyga runta ah.

- " Abbaayo xumaan ha iga fahmin, hana iga qaadan cuqdad ah doonista hilibkaaga inaan ku cuno ceeriin, waxaan ahay sidaad u jeedid wiil dhallinyara, gayaankaa ah, daneynayana barashadaada; anigoon marnaba jecleyn inaan xadgudub kugu sameeyo, ee abbaayo barasho horteed ha i nicin baa la yiriye horta kasoo deg geedka khoofka iyo shakiga eed dhaladiisa fuushay" buu si uu ka fiirsaday iigu yiri.

Wuxuu ahaa mid ku takhasusay sida loo soo jiito ha-

-blaha oo ah nooca Soomaalidu u taqaan "Shabeel naa-goodka" anse uma qabin inuu iga qaadi karo xataa wax ku siman irbad caaradeed. Inta run ahaantii cabsidii markii hore aan ka qabay iga ba'day baan si ka fiirsasho leh ugu jawaabay;- " Wallaal is barashadu ma xuma co di-yaar baan kuula ahay haddii aysan aheyn mid ka baxsan fal-kan insaanimada ku dhechan ee aad ii sameysay; anna koll-eyba intii la doono aan abaal kaaga hayo."

"Ficilkani abbaayo waa mid igu waajib ahaa ayna habb-oon tahay bulshada inteeda awoodi karta ineysan wadada ku dhaafin kan lugta ah ee ihibanteysan sidaadoo kale, tan kale wallaal aan wax ku heydsiyee adoo iga raalli ah ma madax bannaan tahay oo ma kula haasaawi karaa?" buu i su'aalay.

-"Maya oo wallaal waa la i qabaa" baan u ceshay.

-"Abbaayo runtaa Rabbi kugu jecel yahaye waa la i qa-baadu ma tii gabdhuhu iska caadeysteenbaa mise waa kaa dhab?"

-"Sidaad doonto u qaado laakiin anigu waxaan ahay mar-wo u mehersan wiil adoo kale ah."

-"Wallaaley Ilaaha weyn wejigiisaan kugu dhaariyaye ha i khaldin oo idiid haddaad rabtee runta ii

Markaan muddo 3o daqiiqo ama ka badanba ah taagnaado awuu hadba imanayey bas; kaasoo inta fuushaa ay ah-aayeen kuwa noogu awoodda roon ama noogu fudud. Waxay taasi igu kalliftay inaan is naco, hiifo nafteyda, ma-rarka qaarkoodna aan ku sigto inaan salka dhigo xakabadda wadada ay dhooqada iyo saanta dadku wasakheeyeen si aan ugu daaltirto.

Dhanka kale waxaa cabsi weyni iga haystay cannaanta, goodiga iyo dharka aan ka filayey Eeddaday(Aayaday), naa-dee[illegible]an la deshay alaabtii guuqa. Kama sugeyn naxariis iy[illegible] daraf aroon waxba sameyo. sababtoo ah iyada mar-kaadu marna ma yeesho cududaar hadiii sidii ahaa aan loo qaban. Waxaan dancay markaa inaan [illegible]ka lugeeyo. Xoogaa ha-ddii aan ka dhex baxay dadkii ayaan haddana istaagay anoo daneynaya helitaanka bas.

"Qiiq" wuxuu ahaa dhawaaq uu iisoo tabiyey dhambaal wadaha dareenka dhegteydu ka dib markii meel aan iga fo-geyn sentimitirro farriinka lagu cuskaday gaari yar oo cad ahna nooca CORONA-da loo yaqaan. Waxaa shirka ugu jira wiil dhallinyaro ah oon da'da ka weyneyn 22 sano, caato dhuuban oo gudan ah, ilko cad oo cirid madoow lagu ma-riimeyna leh.

Inta furay muraayadda albaabka daaqadda hore oo soo hanqalooosaday, buu isagoo dhoola caddeynaya siduu i yaqaan cod uu malaha naxariis bidayey ku yiri;-"Abbaayo nakeen aan ku dhaweeyee!!!!!!!!!!!!!"

Falkaasi ma aheyn mid igu cusub oo way ka badneyd wadar jeer, intaan la kulmay mid sidaasoo kale iigu qaldama; hase yeeshee markan waxay aheyd markii iigu horeysay ee ay niyadda iga gasho;-"Tolow ma iska raacdaa? Muxuu kaa qaadayaa? Ma waxaadan raalli ka aheyn buu kugu sameyn karaa?.." Hoonaan laheydaa inaan diidaa maalintaa!!!!!!!!

Markuu i weydiiyey su'aashiisii aheyd;-"Nakeen ku dhaweeyee?" muddo sekenno ku siman baanan u jawaabin aniga oo ah maskaxdeyda kusoo qulqulayeen in ka badan 50 weydiimood oo gebi ahaanba aanan sugin jawaabahooda. Waxaan ugu dambeystii dantu kaa adage ahoo eegaya dhibaatada iga haysata baabuur la'aanta, saacadaha badan een taagnaa, alaabta la iga sugayo eon la daahay iyo inaanan marnaba fal aanan taalli ka aheyni i mareyn go'aansaday inaan iska raaco.

Anoon la hadlin ayaan alaabteydii inta kor usoo qabsaday u hinqaday qaadista tallaabo aanan waligay

sheeg."

-Inta isku naxay oo ka xumaaday beenta aan sheegay baan ugu jawaabay;- " Oo maxaad ii dhaarineysaa..Runta marka loo hadlo aniga la ima qabo laakiin waxaan leeyahay yahay saaxiib hal naf aan wadaagno, haddii Qorraxda gacanta midig la iga saarana aanan ka gö'i karin xiriirkiisa; markaa waxaan la mid ahay qof la qabo oo kale ee wallaal mid madax bannaan allaha kuu yasiro."

Waxaa kasoo baxday neef weyn. Malaha waxaan ka furay albaab uu ku daalay neel uu kasoo gulo. Inta dhoola caddeyey oo g[illegible]ersada gaariga ku qabtay midna sare u taagay [illegible] layaal leh u yiri;- " Al-xamdu lillaahi abbaayo intaasiba waa wax dhan!!!!!!!!!!"

Waxaan la yaabay ujeeddadiina, waxaanna go'aansaday inta aan ka gaarayo gurigayaga oon markaa kasoo dhaweyn aanan mar qura bishimaheyga u kala furnin.

Markuu cabbaar aamusnaa buu inta isoo fööraahay yiri;- "Abbaayo maxaa kugu dhacay oo aad hadalka iiga giisatay?"

Waxaanse ugu warceliyey;-"Wallaal aad baad u mahadsan tahay iina jooji halkan waan joogaa xaafadeydiiye".

Intuu caboojiyey gaarigii dabadeedha farriinka cagta ku hubsaday buu i su'aalay;-"Anwayna wallaal gurigiinnu albaabkii baan ku hor dhigayaaye?"

Waxa kaliya aan ka baqayey wuxuu ahaa inuu arko gurigayaga, si uusan mar dambe iigu soo noqon; anoo suureysanaya dhibaatada uu i gaarsiin karo hadduu gurigayaga inta yimaado yiraahdo "Nasraan rabaa".

Sidaan kusoo sheegay qeybta 1aad ee qisadan, hooyaday macaan waxaan waayey anoo 8 jira, hal sanno iyo laba bilood ka dibna waxaa aabbahay booskeedii kusoo buuxiyey mid aanan nolosha ku mahadin. Eeddaday oo aan oggahay iney wax badan dusha iga huwin jirtay dambi aanan falin si ay iigu dirto aabbahay oo ahaa mid aad u kulul, qowl kiisa iyo gacantiisuna isla socdaan maxaa dhici lahaa haddii ay igu heli laheyd intan?

Malaha waxayba igu caddeyn laheyd inaan muran la'aan ahay mid ka hoogtay dabeecadda san iyo dhaqanka suuban ee hablaha.

Anoo iska furaya albaabka gaariga, su'aashiisiina usoo noqonaya baan ugu jawaabay;-"Wallaal gurigayagu ma fogee waad mahadsan tahay" oo damcay inaan dhaqaaqo.

Xasan;- "Abbaayo ii sheeg magacaaga runta ah ee Illaah kugu ogyahay adoo ka fogaanaya beenta" buu iiga daba tanaagooday.

-Inta isku naxay oo niyadda iska iri;- "Oo ma waxaad magacaaga runta ah uga qariso baa meesha yaal" ayaan si daacad ah hadal qaboow igu iri;-"Abboowe raalli iga ahoow beentaan kuu sheegay, waxaan kuu qabay kuwa meheradoodu tahay dulleynta hablaha yar yar ee jecel iney hilibkooda qaaliga ah ku helaan casho habeena; sida runta ahna magaceygu waa Nasra Warsame ee wallaal nabadgelyo." oo iska dhaqaaqay.

Waxaan hubaa erayadaasi iney xiddidada u aaseen geed uu jeclaa inuu abuuro si harkiisa uu berri ugu nasto. Wuxuu meeshii taagnaa ilaa uu ka hubsado aqalka aan geli doono, markuu taa xaqiiqsadayna waa iska baxay.

Waxaa igu kulmay farax iyo naxdin wada jira!!
****

Mahad kan ku weyn niyaddayda, midka ku abuuran xubin kasta oo jirkeyga ah, wuxuu soo dhameystay shaqadii Qaranka mar uu sannad kasoo wareegtay hadda, wuxuu Imtixaan u galay JUS, taasoo uu helay Kulliyadda Dhaqaalaha(Economia), aniguse waan waayey. Wuxuu ku xerooday Kulliyadaa billo hortood, nasiib darrose muddo laba toddobaad ku siman kama helin wax wara, aragiisana ma arag anigoon wax ku dhacay aqoon.

Taasi waxay igu abuurtay feker iyo wel wel joogto ah, maadaama Mahad uu ahaa midka kaliya een ka calmaday koonkan si aan ula qeybsado ayaamahe nolosheyda ka dhiman. Xiriirka naga dhexeeyey wuxuu ahaa mid u horumarsan si aan qiyaas laheyn oo ku dhisan isku kalsoonaan, is aamin iyo niyad saafi ah oo uu hareeyey cishqi run ah.

Wakigay kuma riyoon, maskaxdeydana ma gelin adigaa u adeegsan doona sunta halista ah qalajinta goedka ku naaxay illinta jaceylka runta ah; adaa noqon midda weydeyn cahdigii adkaa. Laakiin wa[illegible]ba waxay u muuqdeen inuu ku socda iraadada rabbi iyo wax ka baxsan awoodeyda.

Kana soo warceegan maalin qur ahi markii wiilkii yaraa ee shalay anoo aad ugu dhibaateysan igo soo qaaday wadada, uu inta gaarigiisii ku calaqay albaabka gu gayagii oo iska furay daaqadii si xarago leh dhow ula aabo usoo qaaday dhankii iridda uu saddex joer garaac uu ka fiirsaday fardha ugu xaday ganjeelka aqalkayagii isagoo gacanta jeebka kula jira.

Nasiibkeyga galabtaa aabbahay iyo eeddadeyba waxay bexeen waqti hadda oabbaar lega joogo sa ay ilmaha yar yar lagu soo gaaraan dhar, waxeana guriga joogay ariga

iyo laba wallaalahay oo iga yar yar.

Waxaa furay Raage yare markaasuu isna hadal uga bilaabay;-"Abboowe ma joogtaa Nasro?"

Raage;-"Haa" buu isna si deg deg ugu warceliyey.

Xasan;-" Iigu yeer"

Raage;-" Abbaayo Nasro wiil baa albaabka kuu taagan" wuxuu ahaa hadal aan marna ku farxay marna ka naxay walaalkay iisoo tabiyey, waxaa yeelay mar waxaan is iri;-"Tolow ma gacaliyahaa Mahad oo fasax soo qataybaa?" Marna waxaan is iri;-"Amuu yahay inkaar qabe kula damacsan qaxar."

Anoo tallaabada is daba dhigaya ayaan usoo dhaqaaqay dhankii albaabka mise....

Xasan;-"Abbaayo macaan Nasro iska warran" waxay ahaa ayeen erayo uu i yiri si cajiiba isaga oo qofkastaaba dareemi karo inuu yahay ruux la hayo oo wax uun shidayaan.

Cajab rabbiò, malaha wuxuu hortaagnaa muraayadda intuusan soo bixin saacado badan sa uu u yeesho muuqaal iyo qurux uu kusoo jiidan karo inta indho ku caqliga ah ee xubigooda ku saleeya dhaldhalaalka dunida een berri lagu tashan karin, sababina kara jaceyl cimrigiisu maalmo yahay.

Inta qosol aan niyad aheyn dhoola caddeeyey ayaan anoo salaanta ka qaadaya inkirayana iri;-"Abboowe nabad iyo Iaahay galladiise yaad rabtay?"

Xasan;-"Abbaayo miyaadan i garaneyn, waxaan ahay Xasan, kii shalay kaasoo qaaday Suuqa" ayuu si layaab leh isaga oo ruuxa iska siibaya ula soc booday.

"Haa" Xasan miyaa, wejigaagaa igu yaalay laakiin waan soo saari waayey meeshaan kugu arkay" ayaan u raaciyey anoo xoogaa weji furnaana u muujinaya.

Malaha wuxuu iga sugayey inaan inta fariisiyo, cabitaan u diro, sheekada la laba shubo, dabadeedna ka dhayo boogo uu rumeysnaa inaan hayo dawadooda, anna waxaa wax walba igala darnaa iridda uu taagan yahay oo aan is lahaa"Alla yaa mar uun kaa hor dhaqaajiya inta uusan meesha ugu imaan Aabbahay oo aan ogaa sida uu u shaki badan yahay iyo Eeddaday(Aayo) oon hubo hadday wax yar oo dambi ah igu hesho ay buunbuunineyso ilaa xad, markaa waxaan aad u daneynayey inuu maruun iga hor dhaqaaqo.

Anoo garan la' waxaan ku iraahdo baan ugu war celiyey;-"Hadda wallaal maxaa darnaa?"

Xasan;-"Abbaayo war dhafoor buu ku yaalaa, ma waxaan

doonayaa isweydiin leh la joogaagaan usoo qasdaye" buu si uu ka fiirsaday iigu jawaabay.

"Wallaaltinimada caadiga ah iyo abaalka intii aad ii gashay aan kaaga hayo marka meel la dhigo Xasan agteyda kaagama furna wax kale xataa haddii uu ruuxu kaa baxayo ee wallaal waqtigu yuu kaa lumin, doorashaduna yey kaa xumaan ee nabadgelyo" ayaan isu raaciyey, anoo hadalka soo gabagabeynaya is lehna alleylehe waad qancisay, wuxuu ku tagana waad tustay, laakiin weli wuxuu ahaa mid soo indho adag kuna quusan la' taa.

Xasan;-"Abbaayo waxaan agtaada kaga tagaa waa anoo u hoyda meel aan laga soo noqon iyo iilka aakhiro, waxaanna gaaray heer aanan kaa go'i karin ee ka fiirso wallaal go'aankaas" buu isagoo gacmaha iisoo taagaya si uu garka ii qabsado i yiri.

"Layaab!!" Indho adakaa.. Goormuu ii dhimanayaa shaluuba i bartaye. Anoo la amakaagsan dhiiranaantiisa baan si kulul ugu iri;-"Ma leedahay damiir wax garta iyo caqli, ha la gaaro goortaad ii dhimato laakiin hadda waxaa soo dhow guriga aad sidii sanamkii u liqdaaran tahay hortiisa dadkii lahaa; haddii ay kuugu yimaadaana weji kale baad galabta meesha kala caraabeysaa ee intey goori goor dahay xalbo "waa iga talee" oo xoog u xirtay albaa-

-bka isagoo meeshiisii taagan.

Taa waxba kama dhigan, markii aan usii sooday qol guriga ka mid ahna waxaan maqlayey isagoo meeshii ka leh;-"Abbaayo Nasro naftaa ku dooratee nabsi ha iga gelin", laakiin anigu ma kala dareemin dhawaqa ka baxa shimbiraha saaran geedaha dushooda een la aqoon micnihiisa iyo kiisu waxay ku kala duwan yihiin.

Markuu cabbaar ka guryamayey meeshii ayaan waayey shanqartiisii, waxaan anoo qosol layaaba dhoola caddaynaya is iri fiiri kii. Markaan furay albaabkii- ba waxay indhahaygu qabteen isagoo meel aan 10 tallaabo ka fogeyn guriga jardiino ah soo fadhiya.

Markuu labada indhood i saaray buu horey usoo dhaqaaqay, anna si dhaqsa baan hoosta uga xirtay oo iska dhexgalay howshii guriga.

WALLEE KAAGAMA HARO SIDAA !!!!
****

Waxaa la gaaray 7:00dii fiidnimo, waxaanna iyaga oo magaalada kasoo noqday soo gargaaray albaabka aabbahay iyo xaaskiisii. Haddii aanan codkooda garan laheyn waxaan u qaadan lahaa kii malakulmowdka ahaa ee un soo taagnaa.

Markii xoogaa la joogay ayaan damcay inaan dukaanka ka doono alaab, wax yar gurigii intaanan ka soconba waxaan gadaashayda ka maqlay;-"Abbaayo gayaankaa cishqigaagu gubayaan ahee ha fududeysan arrinkeyga.." iyo waxyaabo kale aniguse aanan dareemin inaan maqlay iyo in kale.

Waxaan go'aansaday inaanan mar qura bashimaheyga u kala furin. Siduu iiga daba adimayey ayaan galay dukaankii, isna bannaankuu isu kay taagay. La yaab badanaa!! Markaan alaabteydii soo wada gatay ee aan [illegible]ankii kasoo baxay buu isagoo isla kay simaya yiri:- "Nasro abbaayo macaan miyuusan kugu oolin wadna naxariista iyo qalbi damqada midna, maxaad sidaa iigu galaysaa?"

I^Nta aad u xanaaqay ayaan anigoo indhaha ku gubaya hadal aanan ka war qabin ku iri;-"War naxariista seege boos igama kaa bannaana ee iga har miyeysan ku qancin, wax kale haddii aadan dooneyn ha kusoo lu go'in aqalkayaga mar dambe."

Kani ma noqon mid ku raalli noqda intaa, wuxuuna iila muuqday inuu yahay duqsi fuud kulul ugu sooda dabaal, laakiin waligay uma sheegin niyadeyda mar uun bay rumoobi

doontaa riyadiisu oo aad oori u noqon.

Markaan ku dhawaaday aqalkayagii buu inta dib isu taagay igala daba tanaagooday;-"Wallee Nasraay si aan kaaga haraa waa anoo iilka la i seexsho oo kaliya. Inta cabbaar soo eegay anigoo la amakaagsan baan albaabkeygii hoosta ka xirtay.

Runtaa marka loo hadlo waan ahaa guur u doog, wayna igu habbooneyd in aan naftaa ka qaado tijaabooyin si aan u ogaado bal inaan isku fikrado iyo dabeecado dhow nahay iyo inkale, laakiin maahmaah horaa aheyd;-"Shimbiri laba geed ma wada gurato" oo aniga niyadèydu waxay ku xirneyd meel qura, qalbigeyguna wuxuu la haystay midka aan rumeysnaa in aanan sinnaba uga go'i karin, midkan soo xaluushayna uma heyn boos iyo niyad toona.

Waxay igu qaadatay muddo laba bilood oo wax yar dhimanna inta meeshaan istaago, goobta aan maro iyo meel kastoon joogaba uu Xasan ahaa mid ii taagan. Cay, cannaan iyo goodi ulama harin laakiin wuxuu u muuqday mid siyaasi ah oo dantiisa ka raacda wax walba ilaa markii dambe aan gaaro heer aan iska baryo oo iraahdo;-"Wallaaloow miyaadan laheyn dhego wax lagu maqlo

iyo caqli wax lagu garto toona, boos kuuma hayee gabdhuhu waa badan yihiine wallaaloow suuqaaga gal.

Ma kula tahay inuu iga yeelay? Waxaad mararka qaarkood haddii aad arki laheyd is moodsiin laheyd inuu igu waashay, dunida inteeda kalena uu ka indho la' yahay oo ay mugdi la tahay.

Dhanka kale midkii aan la wadaagay jaceylka runta ah, la muudsaday miraha macaan ee cishqiga, gaaliyaheygii Mahad wuxuu iga sii maqan yahay Todobaadyo, wuxuuna ku xareysan yahay J.U.S., oo ma arag aragiisii in ku siman saddex toddobaad, wax ku dhacayna war uma hayo. taas oo igu dhalisay wel wel iyo feker aan la seexan waayey habeenno badan.

-Wedka lama huraayee Allahayoow wadeecada
Adaan kaa wakiishay.

WUXUU AHAA HABEEN BAAS!!!!

-Dadku kala ayaan badan, ishaaraduna kala wacan

Ifkuna aayo kala roon.....

Wuxuu ahaa habeen baas, goob aanan mahadin, kulan ay yeesheen laba aan aragooda maanta ka neobahay wax

kasta. Waa Xasan iyo C$_u$mar. Barta kulanku waxay aheyd meel aan sidaa uga fogeyn gurigayaga.

-"Haye Xasan" buu Cumar hadalkii ku bilaabay.

Xasan;-"Waa wareey! war Cumar ma nooleyd, xagee ku jirtay ninyohow?"

Cumar;-"Wár waan nooleeye aragaagu muddaba xaafaddaa ka dhex muuqdaye maxaa jira saaxiiboow?"

Xasan;-"Waxa jira waxaad baabkooda geli karto maahee ii waran saaxiih."

Cumar;-"War wax dhibaato ah ma sheegine, Xasanoow in ka badan [illegible] ayaan ku arkay adoo xaafaddan kasoo baxaya ama soo galaya, sida raadkaagu ugu batayna waxaan hubaa haddii aadan soo degin inuu deggan yahay qalbigaagu ee [illegible] ii sheeg sida wax u jiraan?"

Xasan;- Kama nixin erayadaas waayo Cumar wuxuu beryo ahaan jirey saaxiibkiisa kaliya ee naftiisu ku dhaarato balse ay hadda is moogaayeen muddo sannad ku dhow.

I$_n$ta xaggiisii usoo jeestay buu lasoo booday;-"War wax jira oo dhanba anaa kula socodsiin doonee saaxiib ma xaafadaad wax ka deggan tahay mise dool baad ku timid?"

Cumar;-" War dool kuma imaane muddo badanba waxaan degg-

Q E Y B T A 4a a d

***

xageese ugu hagaagnaa?"

"Aabbo inkastoo aan door biday in aanan arrintan ugu tagin adoon ila socon, haddana waxaa gabadha dhalay oday aan ayaan u sameeyey asxaan weyn oo intii la doono ii han weyn, halse aan u maleynayo inuu yahay mid ku maman xoolaha oo aad u lexejeclo badan."

"Wax kasta oo aan nafteyfa aheyn oo gabadhaasi ku xiran tahay anaa la diyaara ee mar uun odeyga ii gee!!"

Xasan inta is heyn waayey buu dhunkasho kula qalalay labadii dhaban ee aabbihiis isagoo leh;-"Alla Illaahayoow aabbahay ha iga qaadin, allahayoow cimrigiisa labanlaab."

Maaliin aan xuduntooda god la galayo, oo ku beegneyd 18 Abriile sannad aan sheegidiisa ka maagayo, waqti ay saacaddu abbaareysay 4:30kii ayey afar aysan wali muuqoodu ka tirmin maskaxdeyda soo gargaraaceen albaabka. Waxaan u diyaar ahaa imaatinkooda inaan iridda ka furo mase fileyn iney kuwan noqon doonaan; waayo aabbahay oo ay ka muuqato weji farax leh oo aanan muddo ku arag ayaa maanta qadadii ii sheegay inuu galabta la ballansan yahay rag xil ka mudan sidaa awgeed aan usii diyaar garoobo sidaan ugu diyaarin lahaa shaah iyo waxyaabo kale oo soor martiyeed ahba.

Albaabkii ayaan furay, mise waa afar nin oo mid ka

mid ahi wejigiisu uusan igu cusbeyn, saddexda kalena mid ahaa aabbihii, midna adeerkii, kan kalena saaxiibkii.

Markiiba waxaa kor iyo hoos ii qaaday dareen xoog badan, waxaa igu abuurmay shaki, hase yeeshee ma garaneyn meesha xaal marayo. Inta soo geliyey gudaha oo farta ugu fiiqay qolkii fadhigooda loo sii diyaariyey ayaan durba iyadoo niyadeydu badalantay inta u galay aabbahay ku iri;-" Aabbo way joogaan nimankaad sugeysay."

Aabbahay oo galabtaa aan isula harin wax kasta oo saari lahaa bilicdiisa, ayna Eeddaday(Aayo) ka jeegareyneyso labiska baa inta soo istaagay hadal aad u qaboow igu yiri isaga oo madaxa ii salaaxaya ;-"Aabbo macaan adigu iska gal qolkaaga, Eeddadaa baa noo keeneysa waxaan u baahannahaye, oo saan qaad uu ka fiirsaday u qaaday dhankii qolkii ay ku jireen nimanku.

Waxaa ii cadaaday markaa wax walba, inkastoo ay haddana iga maqneyd run iyo xaqiiqooyin badan. Anoo aad u naxsan, wadnuhu uu ii garaacayo si lixaad leh, meel la iga jirana aan aqoon baan si tigsasho ah isugu kor xooray sariirteydii.

Inkasta oo aanan waxba ka ogeyn kulanka maanta hadana waxaan saadaalin fiican ka haystay go'aanada ka

soo bixi doona. Waxaan u bandhigay nafsadayda bal waxay awoodi kari laheyd haddii Xasan oo aan shalay ku laaday gacmo hoorsogiisii inaan la daadihiyo jaceyl qasaba oo wuxuu hanti iigu faanayey inuu leeyahay isaga iyo aabbihii ay cadad kasta ha ahaatee maal badan farta ka saaraan aabb. ahay oo lexejecladiisa aan u quurin xataa maalkiisa inuu si wanaagsan uga daryeelo nafsadiisa; oo uu isna markaas go'aa sii aan ka hor imashada laheyn iigu soo jeediyo inaan anoo han oori u noqdo midkaa aanan ku dooran dookheyga laakiin l iga iibiyey!! Waxaanse ku daalay helidda jawaabtaa.

Waxaan dul goglanaa sariirtaan ku seexday galabta waqti eer, markii 9:30kii habeenimo la joogo ayey Aabbahay iyo gu kiisii kasoo bexeen shiqkii, go'aankiina wuxuu kusoo gabaga bay in iyadoon waxba la i weydiin si sahala aabbahay igu si: midkaa aysan naftu jecleysan.

Baxe kuwii iyagoo runtii xambaarsan guul ay ka gaareen a rinkoodii, wax yar ka dibna Aabbahay oo ay wejigiisa ka muuq farxad baa albaabka kasoo galay markuu sagootiyey nimankii k dib!"Aabbo ma casheysay" buu hadal iiga bilaabay. Ma casha eg sidii ceesaan lagy qalayo Makhaayad ayaa maantoo dhan lag gorgortamayey beeceyga. Anoo hadalku i dhibayo oo hoos eeg ciddiyahaygana waxaan ku jirin ka raadinaya baan ku jawaabay "Waan casheeyey."

Habeenkaasi wuxuu ii ahaa habeen baas, indhana isuma geyn ilaa uu korkeyga ka yeeray aadaanka salaadda subax. Waxaa beryey waa laga yaabo dad badan inuusan uga duwaneyn subaxyada caadiga laakiin nolosheyda ku reebay xusuus aan dhammaan iyo tiiraanyo joogto ah.

Aroor walba waqti hore ayaan inta kaco quraac reerka u diyaarin jirey, laakiin saaka maya. Markay 8:00dii subax-nimo saacaddu abaareysay buu iisoo galay aabbahay, isagoo madaxa gacanta iga saarayana hadal qaboow ku yiri;-"Aabbo macaan saaka ma xanuunsan tahay?"

Inta naxariis waalidnimo i qaadatay baan lasoo booday ;-"Maya aabbe ee madaxaa xoogaa yar i wareeraya."

"Aabbo hadda makuu doonaa daawo mise waad ladan tahay?"

"Waan ladanahay Aabbo" baan ugu jawaabay.

Inta uu dhaqaaq u holladay oo isoo jaleecay buu yiri;-

"Aabbo adaan ku sugayaaye inta isasoo diyaarisid iigu imoow qolka fadhiga" iskana baxay.

Caabbaar ayaan sii fadhiyey meeshii anoo awoodi kari la' waxaan sameeyo. Iyadoon cudur i haleelin baan qaadi kari waayey xubno ka mida jirkeyga. Dantu waa seetee inta istaagay oo wejiga iska soo dhaqdhaqay, masarkana madaxa ku hagaajistay baan anoo tallaabada jiidaya galay qolkii ballanta ee aabbe igu sugayey.

WAXAA LA IGU IIBIYEY QIIMO SAARE!!!/

Markii hore wuxuu u galay hadallo waano iyo wax u sh
ku saleysan, markii xigeyna wuxuu iigu soo celceliyey d
ibaatada iyo hoogga uu leeyahay amarka waalidka oo lagu
caasiyo iyo kheyrka aad adduun iyo aakhiroba helayso ha
ddii aad baari u noqoto amaradoodana fuliso. Ugu dambey
tiina wuxuu galaas ii daray hirarka badweynta amaanta e
kan uu ii dooray isagu.

dooray

Wuxuu ku dheeraaday magaca, maalka iyo haybadda uu k
leeyahay bulshada dhexdeeda qoyska mid ka mid ahi uu is-
oo calmaday. Wuxuuna hadalkii iigu soo gunaanaday, in m-
aadaama uu ku kalsoonaa in aanan qowlkiisa diideyn, tix-
gelin waalidnimo oo weyna u hayo uu i bixiyey ina siiye
mid uu ku tilmaamay inuu hanan doono mustaqbalkeyga.

Inkastoo erayadaasi ay gantaallo mariideysan si na-
xariis la'aana ula dhacayeen halbowlaha wadnaha iyo laa-
bta haddana iguma dhalan argagax iyo naxdin xad dhaafa,
waayo wuxuu ahaa mid aan sugayey. Inta ay igasoo burqat
ilmo aan ku awood dareystay celinteeda baan anigoo
dhabanka gacanta ku haya iri:-" Aabbo macaan miyaanan
xaq u laheyn anigu inaan xusho guurkeyga? Miyaadan aabb
tixgelin doonisteyda; waxaad iska gaartay go'aan la mid
mid nasasho ugu sooda geed aan har laheyn!!!"

"Aabbo wiilka aan aqaan ee ciyaala suuqaa ee habeenba
gabar jecel inuu ka dhumiyo mustaqbalkeeda, habeenna
ma rabo maallinna ma rabo."

Waxay aheyd markii ugu horeysay nolosheyda een ha-
dal sidaa u dhiiran kala hor imaado Aabbahay, go'aan-
kiisana ku gacan sayro, taana waxaa igu kallifay ar-
rinta qallafsan ee uu iila yimid.

Aabbo ha kaakicin xunteyda, hana igu qasbin inaan
kugula kaco waxaanan kuu quurin. Ma anigaa jecel xu-
maantaada iyo inaan mustaqbalkaaga baabi'iyo. Ma an-
aa kuu doori lahaa mid ka hoogay dabeecadda san. Aa-
abbo wuxuu kuu geysto oo dhibaato ah waa waxaan an-
igu kuu geystay ee wiilkaasaan kuu dooraye ha ka
hor imaan qowlkeyga." buu si kulul iigu yiri.

Maxaan kala hor imaan karaa Aabbahay oo fikrad
ahaan meeshuu qabsado in loo gooyo mooyee aan ka
fuqin, xanaaqana ka camal dhow wax kasta! Waxaan
galay aamusnaan dheer iyo inaan dhegaha uun ka m-
aqlo wuxuu aabbahay daldaleyey, wuxuuna ugu dam-
beystii igu taabtay in toban beri ka dib uu ka
dhici doono gurigan meherkeygu, bil ka dibna
arooskeygu ahaan doono oo inta kacay iska baxay.

Kama kicin meeshii oo waxaan u runduday sideydii markii inta uu iisoo noqday aabbahay oo gacanta midig iga galiyey lacag dhan 10,000 SH.SO. markaana aheyd wax aad u fara badan oo geysa wax fiican i yiri;-"Aabbo istaag oo inta magaalada aadid si fiican usoo aratiro" dhaqaaqayna.

Garan meyn waxaan ugu jawaabo iyo waxaan iraahdo midna. Maxaan awoodi karaa? Xageese aadaa?. Ma ku kacaa fal waxashnimo ah oo ma is dilaa? Oo soo markaas noqon maayo mid ku hoogtay adduun iyo aakhiroba? Ma caraaaa? Oo yaan aadaa tan iyo habeenkaan caqli yeeshay kuma hoyan habeen qura meel aan aqalkayaga aheyn oo guri kaleba ma aqaane!!!

Waxaan si xun uga ooyey niyadda. waxaan la ilmeeyey ciil iyo calool xumo aan cid iiga naxariisaneysaa jirin. Si aan kasoo bogsanayo cudur igu daahay baan cuskaday labada jilib, istaagna u holladay. Anoo tallaabada qaadi la' baan tiigsaday sariirteydii halkaas oo aan saacado aad u badan ku barooranayey ilaa ay labadeyda indhood guduutaan oohin awgeed.

Oo maxay baroori tari? Rubad go'day ma kusoo noqotaa dunida mar kale? Qowl waayeel waa qolof geed ka dh-

-aodaa la yiriye ma laga yaabaa aabbahay inuu go'-aankaas ka noqdo! Intuba waxay u muuqdeen kuwo aan guul laga fileyn.

Inta geesinimo iska baarbaaray oo si qarsoodi ah u urursaday alaabteydii baan talo ku goostay inaan u qaxo guriga haberyartey oo kuyaalay agagaarka moosha hadda ah Aargada labaad ee Deg. Wada jir oo M; Muqdisho. Kumaso guuleysan oo markaan habeen qura u hoyday buu subixii dambe iga daba yimid aabbahay oo meeshii laga saraa aysan dhiig yeelateen xanaaqdartii, dantuna igu qasabtay inaan kusoo noqdo hoygii cadaabta.

Marbay xusuusteyda soo gashay inaan inta Jaamicadda u baxsado oo Mahad u tago, dabadeed aniga iscagu ku dhaqaaqno sida ugu dhaqsaha badan inaan isku soo meheresanno laakiin taasi ma dhicin oo waxaa la i saaray waardiyo aan daalin oo walaalkey Cabdi uu xataa musqusha markaan galo dibodda ii taagnaa.

Waxaan ka qoomamooday muddadii dheeraydeen Mahad saaxiibka aheyn waxaan isu mehersan weyney, arooskayagu waqtiguu doono ha noqdoo, hadday taasi suurtoobi laheyd sow maanta warqaddaasi badbaado

uma noqoteen jaceylkayaga doorashada niyadda ah ku saleysan!!

Ma inta hor istaago aabbahay baan oran karaa;-"Anbo wiil baan is jecel nahay kanna ma doonayo; haddaan dhahaso yaa iga akhrisanaya!!!!!"

7 beri gudahood baan ka dhuubtay qori qalalan oo sartu igu dhagtay. Habeen ma aqoon hurdo wax ka badan saacado yar maalinna haba sheegin. Murugada, welwelka, oohinta iyo fekerku waxay ahaayeen kuwo igu mataaneysan oo idaashaday. Cunno aan si xor ah u cuno waxaa iigu dambeysay habeenkii go'aanka qasabka ah la igu dul gaaray, markaan nafta u yaabo gaajo dartood ayaanna wax yar u gudbin jiray caloosha.

Baryadii kunka jeer kor u dhaaftay oo aan aabbahay garka iyo labada jilib haystay si uu iiga daayo wiil baaskaas kuma aburin qalbigiisa xataa irbad naaradood oo naxariisa, kaganana helin gargaar oo wuxuu iigu soo celceliyey inaan ahay qof marwo ah, si maamuus iyo sharaf lehna lagu bixiyey markaa inta iska dhaafo calool jilceca aan u diyaar garoobo reerka dhismihiisu igu soo fool leeyahiyo.

Alla barasho waqanaa!!!!
****

Waxaan gaaray heer quus ah, aan ka rajo dhigo nolosheyda kafan cadna u gooyo jaceylkii muxibada iyo samaanta mudnaa oo naga dhexeeyey aniga iyo midka aan ifka ka calmaday markii aan arkay in loo guntaday u diyaargarowga qabanqaabala xafladda meherkeyga oo hal maalin uu iga xigo habeenkay ahaan laheyd.

Xataa waxaa la iga jaray imaatinkii Aamina, saaxiibteydii kani aheyd, taas oo ii suurta gelin laheyd iney Mahad lasoo socodsiiso waxa dhacay; muxuuse qaban lahaa!!! Malaha ka badneyd wadar jeer inta uu ii yimid balse laga ceshay albaabka.

Dabeecadeydii oo dhan baa is badeshay, waxaan noqday mid maahsan oon kala ogeyn waxa hareeraheeda ka dhacaya. Aabbahay, adeeradey iyo waxgaradkayagii oo dhanba in ka badan 10 saacadood bey mararka qaarkood waano iyo wax san u sheeg igu wadeen iyagoo intii karaankoodaa isku dayayey iney ka furfuraan qufullada ku jaban qalbigeyga si ay amaanta wiilkaas aysan nafteydu jeeleysan ugu hafiyaan. Diidmadeyduse ma aheyn mid waxtarta, saa waxaa ka dambeeyey go'aan qasab ahe.

Waqti waliba nasiibkii, maalin walibana ayaankeeda loho anoo meyd u eke ah ayaa habeenimo Isniini soo galeyso si qasaba la iigu mehershay Xasan ka dib jihaad dheer oo uu u galay helideyda.

Waxaa markan dhagaheyga kusoo dhacayey inaan ahay afo nin leh iyo hooyo reer, laakiin anigu isma ogeyn nolol iyo geeri mid aan ku suganahay. Baroor iyo is calool xumeyn xuduudood waan ka gudbay, waxaanna galay soohdinta aamusnaanta ay xusuusteydu joogto ku ahaato wax tagay oo iiga fog inta dhulka iyo Qorraxdu isu jiraan.

Waxaan noqday naag la qabo, Aabbahay waxaa yarad ahaan loo siiyey xoolo aad u fara badan oo uu ku jiro gaari yar oo uu ku tamashleeyo. Hantida la iiga bixiyey waxaan ku qiyaasay iney u dhigmi laheyd ama ka badan laheydba qiimaha miisaankeyga oo dahababa, taas oo sababtay aabbahay inuu jaceyl xad boolay uqaado wiilkii iyo qoyskii madaxa la iigu kakabiyeyba.

Taas waxaa xaqiiqdii iiga qiima weyneyd ilaa xad aan la qiyaasi karin inaan mid sabaola oon dookhoyga iyo xulashadeyda ku doortay kula soexdo darin, xabadda rootiga ahna ku kala goosanno niyad samaan, laakiin wax waliba ma kuu noqdaan sidaad ugu tala gashay!!!!!!!!!!!.

Caku adduunyo!!!!!!.

Mahad, midkaan la wadaagay jaceylka dhabta ah maalmo badan ayuusan u dhaqaaqin Jaamicaddii uu Chiganayey oo uu ku meereysanayey aqalkayaga bal inuu maruun ila kulmo anoo bannaanka taagan, ka dib markii wax baden loogu soo celceliyey in la i guursaday oo aan ka guuray xaafaddan. Anna waxaan la yaabanaa waxa ku dhacay oo uu inbas iiga maqan yahay.

Oo maxaan u hayaa!!! Waxaa la ii qaatay maadaama aan seegay inuusan ii imaan si aysan u kaakicin sunta fadhi[illegible]lid kasta oo halbowlayaasheyda ka mida, markaan [illegible]anan qarka u istaagin geeri; waloow laga yaabi lahaa iney ii dhaami laheyd dhimashadu xaaladda nololeed een ku sugnaa markaas.

Galab anoo kor jiifa sariir ka mida qolkii aan maxbuuska ku ahaa ayaan maqlay cod leh;-" Hooyo ma joogtaa Nasro?".

"Maandhoow Nasra kuma soo dhawaan gurigan, wax badan baanna kuu sheegay oo xilli aan dhaweyn baa la ar-

-oosaye maxaad ka rabtay" bey jawaab uga dhigtay.

Run ahaantii hadduu jiri lahaa dunida ruux naxdin darteed wadnuhu la istaago Mahad ayey qabsan laheyd markaa. Intuu gebi ahaantiiba gariiray oo miisaankii ka lumay, wejigiisiina is badelay daqiiqad gudoheed buu isagoo istaagga ka liicliicaya hadal uusan ka warqabin ku yiri;-"Eeddo macaan ma kaa dhabbaa?" "Oo ma been baad igu aqoon jirtay" bey iyana si dhiiran ugu jawaabtay.

Miskiinkii Mahad isagoon kalmad kale soo celin buu saanta la raadsaday wadada, isagoo amakaag dartii malaxa gacmaha ku hayana u jiheystay meel uusan aqoon. Wuxuu u ekaa mid isaga oo ay la tageen mowjado xoog badani oo hafasho ah miciin miday inuu cuskado abur dul sabeynaya biyaha.!!!

Waan awoodi karay inaan si xooga inta uga dul boodo Eeddaday, Mahad isku duubo, laakiin maxaan u hayey? Soo ma noqon marwo nin kale, soo anigu kama bixin ballantii adkeyd. Oo maxaan sameeyaa, ma go'aan ay maskaxdeydu gaadhay baan ku jaray xiriirkii wanaagsanaa ee naga dhexeeyey mise waa la iqasbay ilaa xad aan la qiyaasi karin!!!!!!!!!!.

Wuxuu door biday inuu raadsho Saaxiibaday Aamina oo xog-ogaal nyna ii aheyd si uu u hubsado xaqiiqda jirta. Markuu u tageyna mid aad u calool adag bey aheyde waxay dabiyo dacal xubin xubin ula socodsiisay wixii dhacay. Waxay u sheegtay in la i qasbay oo la ii sheegtay awood, iyaduna ay mamnuuc ka tahay iney isoo booqato, Eeddadayna ay been u sheegtay oo hadda anoo mehersan jimsigeygu uu xaadir ku yahay gurigayaga balse mar aan dheereyn la i aqalgeysan doono.

Niyad jabkii iyo murugadii markaa ku abuurmay Mahad ma aheyn mid lagu soo koobi karo qalin iyo warqad waxay xardheen. Wuxuu u arkayey waxaniba iney yihiin wax runta ka fog oo beena.

BI'I WAA ADDUUNYOOY MAXAAD LABA BOGLEYSAA!!!!
****

Galabnimo K$_h$amiisa, habeenkii loo cayimay inuu aqalgalkeygu noqdana ay iga xigto afar cisho oo kaliya ayaan anigoo ku jira qol u dhow iridda waxaa dhambaal waadayaasha dareemaha dhageheygu waxay iisoo tabiyeen erayadan; Aabbahay oo leh:"War Nasro Nasradaada ma ogiyo reerka dadkii lahaabaa horjoogee

ciyaala suuq yohow shaqa jeelo" iyo Eeddaday(aayadey) oo ka daba keentay;-"War galab walba isagoo gagabaya bum isoo galaa oo Nasro Nasrada haya siduu isagu ma-gaca ula baxay. waana u sheegay iney nin coridii ta-hay ee wuxuu lasoo noqnoqonayo baananba garaneyn.!!!

Intaas markaan maqlay ayaan sida miigga anigoon is ogeyn isku sii daayey dhankii albaabka oo miyir la'-aan inta kaga hoos baxay aabbahay iyo Eeddaday oo ir-idda taagnaa dhexda isaga duubay Mahad anoo kusoo oel-celinaya si boobsiisa;-"Mahad..Mahad...Abboowe kama bixin waqadkii ee waa la i qaslay. waxaa la ii sheeg-tay awood taas oo suura gelisay inaanta inaan naag u noqdo ninkale...." intaas markaan iri ayaan dareemay xanuunka ul xoog badan oo laba jeer iiga dhacday bow-dada iyo sinaha oo haddana intuu gacanta iga buuxsaday aabbahay si naxariis la'aana iigu kala tuuray gudaha aqalka, oo inta Mahad usoo jeestay yiri;-"Isagoo ushii u baacinaya"War ma ka dhaqaaqeysaa indhaheyga hortooda mise weji Ilaahay waan kugu aakhiro seegaa!!!!!!"

Iska dhaqaaq Mahad, anna xanuunkii waxba kama dhigan ne inta soo kacay oo madaxa kasoo baxsaday albaabka baan kala daba tanaagooday Mahad;-"Gacaliye Mahad ha-

-daad iiga hor marto iilka aakhiraa inoo ba-llana!!!!!!!! " Oo anoo ilmeynaya ku cararay qolkii iigu dhawaa ka dib markaan arkay aab-bahay oo uligula soo fara baxsanaya.

Inta albaabka hoosta ka xirtay oo iska furay dariishadda qolkaan ku jiray oo ku abaarneyd wadadii uusii jayey Mahad oo sidii hooyo la-gala haray ilmeheedii hadba gadaal soo jalee-caya baan ku eegay indho caashaq oo illintu uga soo burqaneyso sida il biyo ah.

WUU GEERIYOODAY MISKIINKII !!!!!!

Miriro ka dib waxaa dhambaalwadayaasha dareenka maskaxdeydu iisoo tabiyeen wax aanan ilaa maanta ka go'in xusuusteyda. Wadadu waxay noo jirtay wa-xaan ka badneyn 40 tallaabo; markii Mahad oo siduu yahay mid ka mida kuwa ku talaxtogay adeegsiga wax-yaabaha maandooriyayaasha ah tallaabada isdhaafdhaa-finaya, gadaalna hadba soo jaleecaya uugaaray wadad-ii ayaan ku war helay isagoo siduu baalal yeeshay dhex badaa dabaalanaya hawada!!!.

Oo ma sida shimbirka ayuu u duulay!! Maya oo dareenkiisu wuxuu kusoo maqnaa agteyda, waxaanna socday jimsigiisa oo kaliya. Isagoon is ogeyn maaluu marayo buu iska galay si kadisa waddadii dabadeedna.... Waxaa ku kadiyey gaari ka socda xawaare dheeraada oo ku laalaya seedkiisa; ka dibna inta ku dhiftay dhanka bidix oo iska hor mariyey qiyaasta 3 mitir dhererkood oo ka tabatagay bey labadiisii lugood oo hore midna ka martay oelooshatii kalena waxaan jirin ka dhigtay labadiisii lugood.

In taas markii humaagga arageygu iisoo gudbinayeyba waxaan gargaraacay albaabka hoyga waalida. Anoo qevlo iyo sawaxan isku daraya ayaan si miyir la'aana u furay albaabkii qolka; aabbahay oo iridda ii taagnaana dardaray oo iriddii kale inta iska furay anoo sida dabeysha u bidaya balleeyey goobtii shilka.

Waxaan sida kalluun dhex mushaaxaya badweyn u dhex sabeeyey dadkii meesha iiga soo horeeyey, si miyir la'aanana ugu dul habsaday Mahad, kii aan ifka ka calmaday oo geeri qarka u saaran. Labadiisii daan oo dhiiggu uga qulqulayo sida tog biyo ah, indhihiisii ay kor u jillaadmeen ayaan intuba inta ka dhaqsa lehe inta kor madixiisii uga dhiftay dhulka anoo laamiga isbilqayana dhabteyda soo saartay ku waashay;-"Mahad... Abboowe....Mahad.."

Waxay indnaheygu qabteen labadiisii bashimood oo sameeyey dhowr dhaqdhaqaaq, hadalkaas oo inkastuusan maqalkeygu ii sixin haddana aan hubsaday inuu ahaa;-"Abbaayo Nasro waal adduunyo ayaa la igu falisaye ayaan u eeraday jaceylkeygi....Raxmadda iyo nakarisista Eebbe ku nooloo, intaad iga dambeyso, aakhirana laanbaa garan....."

In taas markuu yiraba luguntiisii iyadoo saaran dhabteyda ayey u dhacday dhanka milig, taas oon ku xaqiiqsaday inaan midkaan ifka ugu jeclaa anigu sabab u noqday geeridiisa naftuna ay ka baxday.

Qaraan iyo baroor beryahaab waxaan u ahaaye markii meydkii inta la iga dul qaaday la saaray gaarigii waan anoo diriceygii dhiiggu ku wada hallaabay damcay inaan horey u galo. Aabbahay oo daawanayey sida wax u dhacayaan baa inta garbasaarta igu soo dhegay igu yiri;-"Aabbo macaan soo har marka xagee ku ordeysaa!" Inta ka jiitay baanse horey u fuulay.

Meydkii waxaa la dhigay isbitaalka Digfeer, anna inta geesinimo iska dayey baan shilka dhacay lasoo soodsiiyey Mahad naxariistii janno Allaha ugu deeqee abtigii, kii yaraantiisii soo heyn jirey oo deggenaa Deg. Wardhiigley ee M. Muqdisho.

Mahad wuxuu u hoyday duni kale, waxaanna lagu aasay Qabuuraha Jenneraal Daa'uud ee M. Muqdisho. Qof kasta ehel ama saaxiib ha u ahaadee markuu ka gaduumay aaskiisii waxaan kaligay kusoo haray qabrigii saacado yar ka hor lagu aasay anoo siduu i maqlayo ka dul leh;-"Mahad gacaliye kuma khiyaamin, ballantiina kama bixin oo weli sidii baan kuu jeclahay laakiin awood baa la ii sheegtay."

-Jaceylkii ma weydeyn wadiiqaa i lumisee
wacadkiina maan furin haddana talo warseegtoo
waayo aragnima la'aaney ba' !!!!

Waqtigii la duugay wuxuu ahaa 4:30 galabnimo oo markii Qorraxdii dhacday oo meeshii mugdi noqotay ayaan isaga soo luuday meeshii gurigayagu ku yaalay, markaan soo gaarayna ma gargaraacin albaabkee meel iridda hore oo dhulka ah ayaan salka iska dhigtay. Wax yar intaanan jooginba waxaa igu soo xoomay dadkii deriska ahaa oo ogaa markii dhibaatadu dhaceysay iyo wixii qeylo iyo baroc iga baxayey shalagalab.

Aabbahay oo soo raacay buuqa dadka ayaa bannaanka usoo baxay, markuu i arkayna inta gacanta kor iisoo qabtay buu isagoo wax weyni fikradiisii iska badeleen igu yiri; "Aabbo guriga soo gal". Anoo meyd u eke ah ayaanna mar-

kaas ku dhacay meel.

WAXBA HA I DABIIBINA WEDKA AAN IS ARAGNEE !!!!!
****

Umuurtii dhacday galabtaa iyo sidey iisaameysay waxay sababtay in aroos ku sheegeygii oo dhici lahaa afar maalmood ka dib laga dhigay bil dabadeed, anna inta baabuur khaasa la igu kexeeyo la igu soo wareejiyo goobaha dalxiiska dalkeenna kuwa ugu bilicda san si bal xusuusteyda looga tirtiro midka aan ku waayey ifka.

-Waligeed adduunyada waqtigaa qof saacida midna
waayahaa xira
-Labadaasi waxaan aheyn koraa looga waayayoo
waa nin iyo waagii
-Aniguna wasiisiga waxaan weyda la hayaa iigu wacan
waxyeelada wiish baa ila sare tagay
-Caashaqu wadaad ma leh wallaaloowna kuma haro
waan waana kala tage
-Ee waxba ha i dabiibina wedka aan is aragnee!!!!!!

Wax kasta oo la igu sameeyey qalbigeygu wuxuu hoy dugsoon u ahaa xusuusta Mahad, kii kalgacalku na walaaleeyey balse aysan noo ahaan.

Waxaa la yiraahdaa inta Laah arlada guudkeeda ku khalqay waxaa igu adkeysi badan Geela, isna inta la talo oo nolosha lagu ciriiryo ayaa ilmo uusan dhalin qasab lagu

oggoleysiinaya, anna markan xad kasta ha gaarsiisnaatee waxaan u muuqday mid ka raalli ah la aqalgalka Xasan, ha u qaadan taa inaan maskaxdayda ka tirtiray xusuusta midkaan ayaamo la qeybsaday jaceyl kiisa ugu sareeya, laakiin haddaan nolosha ku waayey ma cirkaan warmo u ganaa!!!

Waxaa dhacay arooskeygii, waxaanna lagu qabtay Hodheelka weyn ee Curuba. Waxaad moodeysay dadka qaarkii iney ku jiraan niyadeyda oo ay daalacanayaan waxa i dhibaya iyo waxa kale. Waxay ka mamnuuceen arooskii in laga qaado wax heeso jaceyla, si aysan u damqan boog ay is lahaayeen biskood bey ku dhow dahay ee qalbigeyga ah.

Habeen Arbacaad ayaan kula seexday sariir mid aysan muddo dheer niyaddeyda gelin inuu noqon doono saygeyga mustaqbalka balse dani ku tiri ah. Waxaan hubaa habeenkaa inoon raalli aheyn oo ka xun sida wax u dheceen inaan noqday ilmo hooyadood; Xasan wuxuu isna mishadaa rumeystay inuu hantiyey koob dahaba oo uu ku guuleysigiisa jihaad dheer u galay.

CALAF LAMA DAGOO LAMA DIIDI KARO WAA DEEQ ILAAH!!
****

Waxaan noqday marwo reer leh laakiin kuma dhaqmin astaameheedii. Saacadaha waqtigeyga intiisa badan waxaan ku qaadan jirey sariirteyda korkeeda anoo u eg qof la maray

oo miyirkiisu maqan yahay. Reerbaad leedahay ee xannaanadiisa iyo daryeelkiisa u gunto ama ninbaa ku qabee raashin iyo wuxuu u baahan yahay u diyaari midna niyadeyda mey gelin. Cunnada waxaan cuni jirey oo kaliya markaan naf ka bax ku sigto gaajo darteed. Dadka lama sheekeysan jirin, waxaanna door bidi jirey inaan waqtigeyga oo dhan u qaato gooni ahaan.

Wax badan ayuu Xasan iisoo jeediyey inaan inta la raaco gaarigiisa, casho iyo tamashleba lamaane ugu noqdo goobaha dalxiiska ee Muqdisho, laakiin kama aqbalin marna, dharka la iisoo dhoobay ee ka buuxa armaajo waxaan ku lahaa hal joog oo aanan iska badelin, kuwa kalena xataa iskuma eegin marna iney i le'eg yihiin iyo in kale. Qofkii markaa i arkaa wuxuu ii maleyn lahaa inaan ahay uun aakhiro oo jimsigeyga oo kali ahi koonka saaran yahay.

Xasan oo ku takhasusay sida loosoo jiito ruuxa insaaniga ah; muddo dheer ayey ka qaadatay siduu niyadeyda uga tirtiri lahaa xusuusta midkii waayuhu nakala fogeeyeen laakiin kuma uu guuleysan taa.

Wuxuu markaa bilaabay iney wax weyni ka go'aan xiisihii iyo jaceylkii uu ii qabay. Wuxuu iga goos-

tay hadalladii waanada ahaa ee uu saacado igu dul akh-
rin jirey maalin walba. Wuxuu guda galay inuu habeenno
ka dhaxo guriga oo uusan soo seexanba, laakiin aniga
waxaa ii sinnaa joogidiisa iyo maqnaashihiisa.

Marar badan buu isusoo ururshay odayaal iyo waxga-
rad si uu u tusiyo dabeecad xumida aan kula dhaqmo
aqalka, laakiin anigu wax walba jawaabtaan ka bixiyaa
waxay aheyd;-"Waa yahay...Waa oggolahay iwm" ka dibna
aan ka ahaa sideydii.

Waxaa sidii ku dhamaaday bilo, waxaanna umulay wiil
aan ugu magacdaray MAHAD anoo ku xusuusanaya kii wa-
qtigu nakala takooray. Markaan ka baxay umushii ayuu
Xasan ii sheegay maadaama uu iga waayey wax ixtiraam
iyo u adeeg naagnimo ah uu i furayo, ka dib markuu
siduu doono yeelay ∕ ugubnimadeydii.

Waa dhaqan ku baahsan dalkeenna oo idil iney oda-
yaashu iyagoon la tashan gabdhahooda ay siiyaan nin-
ka ay doonaan, iyagoo ka qaadanaya yarad iyo xoolo ee
aan tixgelin oggolaashaha gabadhooda, waxa kaliya ee
maskaxdooda ku jiraana uu yahay;-"Hebla meeqaa laga
qaatay.. Yarad imisaa looga keenay ...iwm."

Kama nixin furitaanka la iigu goodiyey, kamana wel
welin meeshaan wejiga siin doono, sababtoo ah waxaan
ahaa mid ka quusatay ifka, geeri iyo nolol dhexdoodna
ku sugan.

HOOYO WAA ANIGA !!!!!!
****
****
****
****

Shan bilood markuu jirsaday cunugeygii oo ahaa
runtii shaqsiga kaliya een ifka kala sheekeysto ayaan
qaatay warqadeydii furriinka. Iguma aheyn filan waa
arrintaasi waayo qof kasta oo waxgarad ahi wuu qiyaasi
karaa inta uu cimrigiisu gaari karo qoys xiddidadiisu
ka kooban yihiin laba la isugu keenay jujuub iyo
duco iyo habaar mid doo

"Haddii aad hayso qoysas ku abuurmay sidaa maantana
sannado badan jirsaday anigu kuwaa kuma tilmaami karo
reer jira waayo waxaan hubaa ineysan wada joogooda ka
faaruqin waqti kasta buuq, isxagxagasho iyo dagaal, ka-
as oon lagu tilmaami karin reer is qaba iyo kuwa aan
is qabin midna."

Hal sano iyo dhowr bilood ka dib habeenkii aroos ku-
sheegeyga ayaan anoo garooba, sita wiilkeygii, watana
wixii meher ahaan maxkamadu ii guddoonsiisay qol carii

jaartay xaafadda hadda loo yaqaan Xamar Jadiid si aan ugu dhawaado xabaashii uu ku aasnaa midka ku beeran xubin kasta oo jirkeyga kamida, si aan u weheshado maalmaha noloshayda ka dhiman.

Saacadaha aan nololmaalmeedka u diyaarinayo nafteyda iyo wiilkeyga mooyee waqtiga intiisa kale waxaan aniga iyo cunugeyguba ku agdhameysan jirey qubuuraha agtooda.

Xusuuso hooyo erayadeydii ahaa;-"Waa sunnada nolosha inaadan gafeyn xayndaabka hoyga farxadda iyo tiiraanyada inta aad dunida ku uuman tahay, maadaama xayaatadu gebi ahaanteedba tahay silsilado xiriirsan oo qaxar iyo wanaagba leh. Sidoo kale insaanku waa miskiin, garashadiisu xadidan tahay; aan u nugleyn ka waqabka halxiraalaha koonka iyo shaxda hagardaamooyinka waayaha, markaa waa wax huri waa ah in ruux kasta oo nadiif ahi uu nolosha kala kulmayo dhibaato iyo rafaad, nasiibkiisu xumaan, maalmuhu ay ku qaloocanayaan....."

Hooyo maanta wiilkaasi waa 10 jir; naftaa imtixaanka intaa le'eg ka martay noloshana hooyo waa aniga, midka ku dhashay ahaanshihii arooskii qasbanaana hooyo waa adiga, ee haddii naftu waa amaanee hadda ay i dey-

-so yaan laga qaadin jirkeyga meeshaan ku go'o haddii aan la igu ag aaseyn qabrigii midkaan ifka u qoonsaday."

Akhriste bilowga qisadan uurkutaalada mudan ilaa meeshan waxay ahaayeen hadallo sida cajilad la shiday oo aan dhamaasho aqoon ay si xiriira ugu waday hooyadii gacalo Nasro.

Saddex bilood waqti markan laga joogo ayaa aad loo qabtay, markuu ku darsaday xanuunkiina waxaa lasoo dhigay isbitaalka Madiina ee M. Muqdisho. Intey ku jirtay isbitaalkan mama uusan maqnaan agteeda xataa habeen qura. Malaha markay is garatay iney geeri dhankeed u badatay ayey amar ku siisay inankeedii yaraa ee Mahad inuu albaabka qolkii ay jiiftay xiro, oo soo fariisto madaxeeda si ay ugu bandhigto waxay noloshiisa ka qarin jirtey; waana marka ay hadal uga soo bilowday horaanta sheekada ilaa erayadeeda ah ;-"Yaan laga qaadin jirkeyga meeshaan ku go'o haddii aan la igu ag aaseyn qabrigii midkaan ifka u qoonsaday."

Saacado ka dib geeriyootay midkiintii nolosha ku dhibaneyd Nasra. Inkasta oo Mahad da'diisu aad u yareyd haddana maskaxda iyo aqliga wuu ka weynaa mid toddobaatan jirsaday. Wuxuuna ku guuleystay in meel qiyaasta laba suxul dhererkood u jirta xabaashii hooyadiy maalin kasta siyaaran jirtey lagu aaso iyadana.

Markuu waayey qofkuu ifka ugu jeclaa hooyadii ma-
oaan waxaa watay aabbihii oo intuu la noolaa hooya-
dii laba jeer oo qura u yimid una sheegay inuu isa-
gu yahay kii dhalay.

Akhristaha buuggan ee qiimeynta mudanoow anigoo ah qoraagga qisadan waxaan dhacdadaan si runa uga qoray qiilkii yaraa ee ay dhashay hooyadii dulmaneyd iyo Abtigii Faysal oo laba-duba indhaheyga igu tusay xaqiiqooyin badan oo aan ku rumeystay arrintaa jiritaankeeda; waxa kaliya een awoodi kari waayey inaan arko labad-ii qabri ee kuwa u dhintay jaceylka runta, sa-babtoo ah waxaa meeshii laga dhisay gu yaha dh-aadheer ee maanta XAMAR BILA loo yaqaan.

D H A M M A A D

Waxaa soo bandhigay qisadan;-

YAASIIN JAAMAC FALAX-FALAX
C/O P.O. BOX 313 Muq/Somaliya

10. R A X M A D I I H O L O S H A: Waa qiso ruux, waa shaqo dhaqday, waa qoraa si xaqiiqa loogu soo tabiyey dhibaatooyaal u geeriyooday oudurka dawada kaliya leh oo ceeshaqa loo yaqaan.

11. Haddii soo bandhigeyaa tilmaamo sax, waxa iyo wax tusaaleyn, waxay sida ileyska fallaarsha caloosha u iftiinaysaa koorka dasha uga rogeysan wadada kheyrka iyo sawaxda ee xuubka inay kuna ku hoyda eqalka cishqigu ay u marsan beeraha jaceylka ee ku naaxay durdureda ilaha xubiga ee niyadda saafiga ah u uurshay.

12. Haddii ka digeysaa in dhaqanka jaceyl xiriirkiisu yihiin xiiso, niyad khiyaali ah iyo murtiyo ciimrigeedu waalmo yahay. Qiasaha RAXMADII HOLOSHA, waxay qoraaladeeda iyo soo bandhigidoodu qaadataay waxido dheer si ay u noqoto sid qaabsan aduunyada qiimeynta xubin ee xiiseeya qoraallada, sidoo kale waxaan hubaa inay noqon doonto sid ka muteysata sujtaanka dhaqdhaqaa ku dayasho tusaalooyinkeeda sax iyo ka fogaasho xaraashideedii.

- Qoraha -